# SIYAASADDA MAALIYADDA CIMILADA

## Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada

**U Diyaargarowga iyo Barnaamijka Taageerada Diyaarinta GCF: Xoojinta NDA, Taageerada Barnaamijyada Dalka iyo Horumarinta socoshada Mashruuca ee Soomaaliya**

**Global Water Partnership Organisation**

***SOM-RS-002***

**March 2024**

## TUSMADA


**MAHADNAQ ........................................................................................................ iii**

**ARAR----------------------------------------------------------------------------------------------------iv**

**SOO-GAABIN ...................................................................................................... vi**

**HORDHAC KOOBAN ........................................................................................ viii**

**CUTUBKA KOOWAAD ........................................................................................ 1**

**MAALIYADDA CIMILADA .................................................................................. 1**

1.0. Nuxurka Maaliyadda Cimilada Adduunka ................................................ 1

1.1. Qulqulka Maaliyadda Lacagta ee Soomaaliya ........................................... 3

**CUTUBKA LABAAD ............................................................................................. 6**

**HAB-DHISMEEDKA SIYAASADDA ..................................................................... 6**

1.0. Hadafka Siyaasadda ................................................................................. 6

1.1. Hiigsi ....................................................................................................... 6

1.2. Ujeedka Siyaasadda .................................................................................. 6

1.3. Mabaadiida Siyaasadda Hago ................................................................... 7

1.4. Adeegsiga ................................................................................................. 8

**CUTUBKA SADAXAAD ........................................................................................ 9**

**MAALGELINTA IYO QEYBAHA MUDNAANTA LEH ............................................ 9**

3.0 Beeraha ....................................................................................................... 9

3.1 Qaybta Biyaha ........................................................................................... 12

3.2 Khayraadka Badda iyo Dhaqaalaha Buluugga ah ........................................ 14

3.3 Qeybta noolaha kala duwan iyo Kaymaha .................................................. 16

3.4 Caafimaadka iyo Fayo-qabka ..................................................................... 18

3.5 Qaybta Tamarta ......................................................................................... 21

3.6 U Diyaargarowga iyo ka jawaabida Aafooyinka ........................................... 25

3.7 Qaybta Warshaaha ..................................................................................... 27

3.8 Gaadiidka iyo Kaabayaasha dhaqaalaha ........................................................................ 29
**CUTUBKA AFARAAD ............................................................................................ 32**
**WAX QABADAYADA ISTARAATIIJIYADED................................................................ 32**
4.0 Hordhac ............................................................................................................ 32
4.1 Samaynta Sanduuqa Cimilada Qaranka ............................................................ 32
4.1.1 Ujeedada Sanduuqa Cimilada Qaranka ............................................................ 33
4.1.2 Hawlaha Muhiimka ah ee Sanduuqa Cimilada Qaranka ...................................... 34
4.1.3 Qaab-dhismeedka Sanduuqa Cimilada Qaranka ................................................ 34
4.1. Qaab-dhismeedka Sharci iyo Nidaaminta .......................................................... 35
4.2. Horumarinta Awoodda Hay'adaha ................................................................... 36
4.3. Qaab-dhismeedka Maamulka iyo Hay'adaha ...................................................... 38
4.4 Qaab dhismeedka Soo jiidan kara horumarinta Maaliyadda Cimilada ..................... 39
**CUTUBKA SHANAAD ........................................................................................... 41**
**DHAQAN GALINTA SIYAASADDA ........................................................................ 41**
5.0. Hordhac ............................................................................................................ 41
5.1. Dhaqan galinta Siyaasadda................................................................................ 41
5.2. Hagajinta Hay'adaha........................................................................................ 41
**CUTUBKA LIXAAD ............................................................................................... 45**
**LASOCODKA, TABINTA WARBIXINTA IYO QIIMAYNTA ........................................ 45**
5.0. Dabagalka iyo Qiimaynt**a** ................................................................................ 45
LIFAAQA: QEEXITAANNO IYO ERAY-BIXIN ............................................................ 47

# MAHADNAQ

Siyaasadda Maaliyadda Cimilada Qaranka (NCFP) ee Soomaaliya waxaa la diyaariyay ayada oo la kaashanaayo dhinacyo badan oo saamiley ah kuwaas oo ka qeyb qaatay dhameystirka siyaasaddan. Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada waxa ay sees u ahayd dhisidda siyaasaddan, iyada oo kaashanaysay hay’ada Global Water Partnership (GWP) iyo Sanduuqa Cagaaran ee Cimilada (GCF).

Siyaasadda (NCFP) waxaa laga talo galinayay mas’uuliyiinta wasaaradaha heer federaal, dowlad goboleedyada, iyo bulshada rayidka. Sidoo kale waxaa laga talo galin hay’adaha dowliga ahayn, hay’adaha caalamiga iyo kuwa dowladda dhexe, iyo guddiga Baarlamaanka Soomaaliya ee Kheyraadka Dabiiciga iyo Deegaanka. Dhammaan inta wax ku biirisay ama ka qayb qaadatay siyaasaddan, waxa aan uga mahadnaqaynaa kaalintii ay ku lahaayeen ee ay ka geysteen diyaarinta siyaasaddan.

Waxa aan sidoo kale u mahadcelinaynaa Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada oo uu hormuud ka yahay agaasimaha guud kaalintooda ku aaddaneyd la shaqeynta mas’uuliyiinta dowladda ee heer federaal iyo heer dowlad-goboleed. Sidoo kale waxaan kaga mahadnaqaynaa kaalintoodii fududaynta iyo abaabulka ee madallada aqoon-isweydaarsiga ee lagu gorfaynaayay diyaarinta iyo dhisidda siyaasaddaan.

## ARAR

Qiyaasahaan 65% dadka waxa ay kutiirsanyihiin dhaqashada xoolaha iyo beeraha si ay nololmaalmeedkooda u helaan. Sidoo kale saboolnimada ayaa aad ugu baahsan bulshada, iyadoo qiyaastii kala bar dadka ay kunoolyihiin heerka saboolnimada caalamiga ah iyo silamid ah sedax meelood halmeel kamid ah waxa ay kunoolyihiin saboolnimada ba'an.

Iyadaoo la eegay onuglaanshaha daranee isbeddelka cimilada, Soomaaliya waxay si degdeg ah ugu baahantahay maaliyadda cimilada si loo taageero is beddelka dalka ee horumar kawaara ee adkaysiga cimilada iyo yareynta qiiqa. Si kastaba ha ahaatee, awoodda xaddidanee hay'adaha dawladda iyo kuwa aan dawligaahaynee ah in ay helaan, fuliyaan, ama ay kormeeraan maaliyadda cimilada ayaa ah caqabad weyn oo ku ah dhismaha adkaysiga-cimilada ee Soomaaliya, taasoo ka dhalaneysaa in Soomaaliya aysan sitoos ah u helikarin maaliyadda cimilada caalamiga ah.

Wax ka qabashada isbeddelka cimilada waxay u baahantahay in aan wax ka bedelno dhaqaalaha, annagoo kudarayna isbeddelka cimilada siyaasadaha iyo tallaabooyinka horumarinta dhammaan qaybaha kala duwan. Tani waxay hoos u dhigidoontaa siidaynta qiicagaaska, waxayna yareyndoontaa nuglaanshaheena ku aaddan dhibaatooyinka isbadalka cimilada, sidoo kale waxay horseedidoontaa guulo lagagaaro yareynta saboolnimada sababtooah, qaadashada tallaabooyin la qabsiga iyo yareynta isbeddelka cimilada waa danaha qaranka.

Caalamka, Soomaaliya waaqayb ka tahay heshiiska qaab-dhismeedka Qaramada Midoobay ee isbeddelka cimilada, borotokoolka Kyoto, iyo heshiiska Paris. Shantii sanoee la soodhaafay, dadaallo badan ayaa la sameeyay siloogudaro arrimaha isbeddelka cimilada siyaasadaha iyo barnaamijya dadalka, oo ay kujirto siyaasadda qaranee isbeddelka Cimilada 2020, taasoobixisa qaab-dhismeed xeerar oo loogutalagalay in sifiican looga

jawaabo isbeddelka cimilada iyo in la helo habab iyo tallaabooyin lagugaaro horumar waara oo kaarboonka laguyareeyo, adkaysina u leh isbeddelka cimilada.

Siyaasadda maaliyadda cimiladu waa arrin muhiim ah oo fududeyneysa dadaalkeenna wax ka qabashada isbeddelka cimilada. Heshiiska Paris wuxuudejinayaa yool ah in la abaabulo 100 bilyan oo doolar sanadkii lagabilaabo 2020 si loo taageero hawlaha yareynta iyo la qabsiga eedalalka sookoraya. Ilo dhaqaale oo waaweynoo ka imanaya xarumaha gaarka ah iyo kuwa dowliga ah ayaa la filayaa in lagu bixiyo hawlaha la xiriira isbadalka cimilada.

Si dalkeenna ugafaa'iidaysto fursadahaan, waa in la helo hay'adahii saxdaahaa iyo habraacyo maaliyadeed si kheyraadka sihufan loogujiheeyo mudnaanta qaranka ee isbadalka cimilada iyo horumarka. Iyadaootaas la tixraacayo waxa aansameynay siyaasadda maaliyadda cimilada. Ujeedada siyaasaddan qaran ee maaliyadda cimilada waa in la xoojiyo oo la hagaajiyo awooddeenna si aan u abaabulno uguna maamulno si wax kuool ah ooaan ula soconno maaliyadda kufilanoo la saadaalin karo ee isbeddelk acimilada.

Siyaasaddan waxay dejinaysaa qaab-dhismeed hagitaan ah oo laguxoojinayo nidaamyada maaliyadeed ee qaranka iyo awoodda hahay'adaha, si wax kuool ah looguheli karo, loo qaybiyo, loo qaato, loo maamulo, lanakormeero, islamarkaana warbixin lagasoobixiyo maaliyadda cimilada sihufanoo mas'uuliyad leh. Siyaasaddan waa tallaabadii uguhorreysay ee Soomaaliya oo kuwajahan dadaal iskudhafan si loo aqoonsado, loo soojiito loonaisticmaalo maaliyadda cimilada si loogu sii ambaqaado yoolalka isbeddelka cimilada iyo horumar kawaara ee qaranka.

**H.E. Ambassador Khadija Mohamed Almakhzoumi**
**Wasiirka Deegaankaiyo Isbadalka Cimilada**
**Dowladda Fedaraalka ah ee Soomaaliya**

## SOO-GAABIN

| | |
|---|---|
| AD | Adaptation Fund |
| ADB | African Development Bank |
| BRT | Buss Rapid Transit |
| CIF | Climate Investment funds |
| COP27 | Conference of the Parties |
| CSOs | Civil society organizations |
| CTF | Clean Technology fund |
| DAEs | Direct Access Entities |
| DFE | National or international development finance institutions |
| E-ProMIS | Electronic Project Management Information System |
| ESPs | Energy Service Providers |
| FGS | Federal Government of Somalia |
| FMS | Federal Member state |
| GCF | Green Climate Fund |
| GDP | Gross Domestic Products |
| GHG | Greenhouse Gass |
| GWP | Global Water Partnership |
| GWPEA | Global Water Partnership East Africa |
| GWPO | Global Water Partnership Organization |
| HSDGs | High-Speed Diesel Generators |
| IFMIS | Integrated Financial Management Information Systems |
| IFRC | International Federation of Red Cross and Red Crescent Societies |
| IMTSC | Inter-ministerial technical steering committee |
| IPCC | Intergovernmental panel on Climate change |
| LULUCF | Land use, land-use change, and forestry sub-sector |
| LV | Low Voltage |

| | |
|---|---|
| MOECC | Ministry of Environment and Climate Change |
| MRV | Monitoring, Reporting, and Verification |
| MV | Medium Voltage |
| NAP | National adaptation plan |
| NCCP | National Climate Change Policy |
| NCF | National Climate Fund |
| NCFP | National Climate Finance Policy |
| NDA | National Designated Authority |
| NDC | Nationally Determined Contributions |
| NDP | National Development plans |
| NIE | National Implementing Agencies |
| NIMES | National Integrated Monitoring and Evaluation System |
| NMA | Non-market-based approach |
| NRW | Reduction of non-revenue water |
| PFM | Public Financial Management |
| R&D | Research and development |
| REDD | Reducing Emissions from Deforestation and forest degradation |
| SCF | standing committee on finance |
| SDGs | Sustainable Development Goals |
| UNDP | United Nations Development Program |
| UNFCCC | United Nations Framework Convention on Climate Change |
| USD | United State Dollars |
| WB | World Bank |

# HORDHAC KOOBAN

Horumarinta siyaasadda maaliyadda cimilada waxay ka timid baahida loo qabo siyaasad cad iyo hagitaan istiraatiiji ah ee gaabka maalgelinta cimilada. Siyaasadda qarannee is beddelka cimilada ee la ansixiyay (2020) iyo wax-ka-qabadka qaranee la cusbooneysiyay (NDCs) 2023 waxay si cad u muujiyeen baahida loo qabo in la aasaaso habab maalgelinta cimalada. Waxay soojeediyeen in la ka faa'iidaysto horumarka weyn ee tiknoolajiyada iyo soojiidashada maalgelinta cimilada si kor looguqaado kobaca iyo horumarka dhaqaale ee mustaqbalka.

Siyaasadda maaliyadda cimilada, waxa ay Soomaaliya ka caawindoontaa kor u qaadidda dhaqangalinta qorshaha horumarinta qaranka, taasoo la go'aamiyay in wax lagaqabto. Aya daoo kor loo qaadayo wanaajinta siyaasadda dalka, xoojinta awoodda la qabsiga ayadaoohorseedeysa wadooyinka horamaribta yareynta kaarboonka, iyo gaarintaanka yoolalka horumarka waara. Siyaasadda nmaaliyadda cimilada waxa ay ujeedadeedu tahay iney ka faa'idaan qeybaha kala duwan ee dhaqaalaha Soomaaliya. Sidoo kale siyaasaddani waxa ay raadineysaa in ay Soomaaliya u fudadeyso helitaanka maaliyadda cimilada, ayadaoo loo marayo habab caalami ah, silamid ah qoondada gudaha iyo ka qeybgalka ilaha gaarka ah.

Siyaasaddani waxa ay soojeedineysaa in wasaaradda deegaanka iyo isbadalka cimilada ay tahay hay'adda qaranee loo xilsaaray dhaqaalaha cimilada cagaaran. Siyaasadda nmaaliyadda cimilada waxa ay kudhisantahay qiyamka 'Mid guud, balse loogu kala saaray masuuliyadaha iyo awoodaha la tixgaliyay' taasoo lagusheegay heshiiska hab-dhismeedka QM ee isbadalka cimilada iyo heshiiska Paris.

Soomaaliya, qarashaadka lagumaamulo dhibaatooyinka la xariira cimilada waa ay labajibbaarmeen. Isbadalka joogta ah ee cimilada waxa ay sababeen qarashaad sare kuwaasoo isagujiro kuwa bulsho, deegaan iyo mid dhaqaale. Abaaraha iyo daadadka waxa ay sababeen in laguwaayonooliga, nolasha dadka iyo wareeggii falcelinada binu-aadinimo. Qiyaasahaan 7.7 malyan oo dadka ah (kala bar bulshada) ee Soomaaliya waxa ay u baahnaayeen gargaar binu-aadanimo sanadkii 2022-ka.

Sidaasdarteed, isbadalka cimilada waxa uu sitaban u saameeya Soomaaliya, bulsho, deegaan iyo horamar dhaqaaleahaanba. Dardar-gelinta iyo xoojinta helitaanka tooska ah iyo iskudaba-ridida maaliyadda cimilada waxay ay lama huraan u tahay dowladda federaalka iyo dowladgoboleedyada si ay u gaaraan hadafyada horumarka dhaqaale, ayagaoo la tacaalaya isbadalka cimilada.

Dalalka horumaray 2020 waxay ballanqaadeen in ay kubixiyaan $100 bilyansanadkii, si ay ugajawaabaan baahiyaha dalalka sookoraya, oo ay kujirto Soomaaliya, ayadaoo ay qeyb ka tahayheshiiska Paris. Sidoo kale shirkadii 28-aad isbadalka cimilada-QM (Cop-28) waxaaloogaheshiiyay in la dhiso sanduuqa waayidda iyo waxyeelada ee isbadaka cimilada.

Siyaasaddan waxay ujeedadeedu tahay in la aasaasooo la dardargeliyo yoolalka horumarinta qaranka ee Soomaaliya iyadaoo loo marayo kordhinta maaliyadda cimilada iyo iskudabarididа kheyraadka taasoo wax kudareysa kaarboon yar iyo yoolalka horumarinta adkeysiga cimilada. Siyaasadda maaliyadda cimilada waxay dejineysaa habraacyada sharciga iyo qaab-dhismeedka habeynta warbixinadasi loo helo, loona maareeyo maaliyadda cimilada taasoo waafaqsan qaab-dhismeedka hay'adaha iyo nidaamyada lagudejiyey Siyaasadda Isbeddelka Cimilada ee Qaranka 2020.

**Hadafyada siyaasaddani**:

1. Waan in ay dhisaan habab maaliyadda cimilada oo wax kuool ah, si loo adkeeyo in ay sitoos u helaan maaliyadda cimilada barnaamijyada la qabsiga isbadalkan cimilada ee Soomaaliya.

2. Waa in ay xiriiriyaan ayna iskudaba-ridaan maaliyadda cimilada si loo taageero qiica-yar iyo horumarinta adkeysiga cimilada iyadaoo la adeegsanayo ilogudaha iyo kuwacaalami ah.

3. In lagudhiirigaliyo hagaajinta dhaqangalinta maareyntamaaliyadda gudaha siwaafaqsan siyaasadda sanadle-ha ah iyo maaliyadda cimilada.

4. Xoojinta jawiga u fududeynaya maaliyadda cimilada iyo kobcinta awoodda hay'adaha Soomaalidasi ay sihufan u helaan, u maareeyaan, una isticmaalaan kheyraadka maaliyadda cimilada, oo ay kujirto aasaaska sanduuqa cimilada qaranka ee wasaaradda maaliyadda iyo kudaristaarrimahacimiladageeddi-socodkamiisaaniyadda qaranka.

5. Kaalinsiintaiyokudhiirigalintaxarumahagaarka eh ka qeybqaadashadamaaliyaddacimilada, ayadaoo la hormarinayo hababmaaliyadeed oo casri ah, kuwaasoo ay siwadajir ah uguwada qeybqaadankaraan xarumaha gaarka ah iyo kuwa dowliga ah.

6. In jinsiga lagudaro qorsheynta, qaybinta, iyo hirgelinta maaliyadda cimilada si loo isticmaalo kheyraadka si cadaalad ah oo waxtarleh, iyadoo wax lagaqabanayo saameynta kala duwan ee cimilada kuyeelato dumarka iyo ragga, lanadhiirigelinayo sinnaanta jinsiga iyo ka mid noqoshada bulshada.

Siyaasadda waxay muujinaysaa tiro talaabooyin istiraatiiji ah oo dhiirrigelinkarta iskudaba-ridida maaliyadda cimilada iyo kordhinta qulqulka maaliyadda. Talaabooyinka muhiimka ah waxaa ka mid ah aasaaska sanduuq amaaliyadda cimilada qaranka (NCF) ee Soomaaliya kaas oo caawinkara iskudubaridka, dhaqaajinta, iyo raadraaca maaliyadda cimilada ee Soomaaliya, oo ay kujiraan ilaha gudaha, wadar-geesoodka iyo iskaashiga laba-geesoodka ah. Tani waxay xoojindoontaa hufnaanta iyo islaxisaabtanka.

Siyaasaddani waxa ay dhiirrigelisaa kobcinta awoodda si loo horumariyo mashaariic/barnaamijyo la maalgelin karo, sidoo kale sihufan loo maareyn karo, lanahergelin karo hindisayaashaas. Siyaasadda sidoo kale waxay adkeyneysaa baahida loo qabo heerarka kalsoonida maaliyadeed, maareynta iyo ku-dhaqanka habraacyada ilaalinta deegaanka iyo bulshada, oo ay kujirto dhiirrigelinta ka-qaybgalka daneeyayaasha ee maalgelinta cimilada iyo falanqaynta kharashka iyo faa'iidada.

Siyaasaddan waxay dhiirrigelisaa xoojinta awoodda dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada si loo hirgeliyo siyaasaddan waxayna taageertaa bulshada rayidka ah iyo xarumaha gaarka ah in ay noqdaan shuraako xooggan. Helitaanka siyaasaddan maaliyadda cimilada ayaa kudhiirrigelindoonta Soomaaliya in ay sifirfircoon ugaqaybqaadato wadahadalada caalamiga ah ee maaliyadda cimilada. Hababka cusub ee suuqa ayaa Soomaaliya u ogolaanaya in ay ahaato mid xaaladaha cusub la socoto, si aynaugusugnaato boos adagoo ay sifirfircoon ugafaa'iidaysato fursadaha ka soobaxa suuqyada kaarboonka, shuraakada horumarinta iyo sanduuqyada cimilada ee caalamiga ah.

- ❖ Qodobada soosocda waa sookoobidda talaabooyinka istiraatiijiga ah eelagugaari karo yoolalka siyaasadda maaliyadda cimilada ee lagudejiyey meelaha suurtagalka ah:

1. In la asaaso sidoo kale la dardargaliyo in si toosa loo helo lacaga kubaxa cimilada, ayadaoo loo marayo dhisidda kartida, sameynta sharciyo, iyo wax ka badalkanidaamka, sidoo kale kor uqaadida heerka kalsoonida, kormeerida iyo qaab-dhismeed islaxisaabtan, silamidah ilaanbulsho iyo deegaan, gudaha hay’adahadowladda.

2. Aasaaska iyo hawlgelinta waxtarkaleh eeSanduuqa Isbedelka Cimilada iyoq aab-dhismeedkiisa,

3. Horumarinta hab-maaliyadeedka gudaha iyo dibadda ee cimilada si loo dardargaliyo loona maalgashado waxyaabaha kala duwanoo mudnaantanaleh ee dhaqaalaha dalka.

4. Dhiirrigelinta iyo fududeynta hirgelinta hindisayaasha kor u qaadaya adkeysiga maaliyadda cimilada, yaraynta gaasaska (GHG) iyo abuurista ganacsiga kaarboonka halka ay suurtogal iyo macquultahay iyadaoo loo marayo suuqyada waafaqsan iyo kuwa iskaa wax u qabso ah si Soomaaliya ay ugaqayb qaadato horumarka bulsho, deegaan iyo dhaqaale iyo xoojinta awoodda wax ka qabashada.

5. In la soojiito maaliyadda cimilada iyo dhiirrigelinta maalgashiga iyadaoo loo marayo qalabyada maaliyadeed iyo kuwadhaqaalaha cagaarani yadaoo loo marayo iskaashiyo iyo siwadajir ah.

6. Deji nidaamyo qaran oo lagukormeero, warbixin lagusoogudbiyo, laguna xaqiijiyo si loo helo aragti buuxda oo kusaabsan hab socodka, ilaha iyo ujeeddooyinka maaliyadda cimilada gudaha iyo kuwa caalamiga ah ba.

7. Hormari nidaam sharci iyo xeerar dhammaystiranoo adag, la fahmi karo, kunasaabsan maaliyadda cimilada, kaasoo ka jawaabaya horumarka Soomaaliya iyo nidaamka maaliyadda cimilada caalamiga ah.

Wasaaradda Deegaankaiyo Isbeddelka Cimilada (MOECC) ayaa hoggaamindoonta oo fududeyndoonta dhaqangelinta siyaasaddan, iyadoo si dhow ula shaqeyneyndoonta dhammaan daneeyayaasha iyo hay’adaha ay quseyso howshaan, si loo abaabulo ilo kufilan loona sameeyo

xeerar iyo sharc iyo loo baahanyahay. Tallaabooyinka istiraatiijiyadeed eelagu xusay qodobka 4 ayaa waxaa dhaqangelindoona wasaaradda iy ohay'adaha la shaqeeya, oo ay kujiraan wasaarada hadowlad-goboleedyada, iyagoo kudaraya qorshayaashooda istiraatiijiyadeed.

Xarumaha cilmi-baarista iyo jaamacadahaayaa door weyn ka ciyaaridoona cilmi-baarista, wacyigelinta, waxbaridda, horumarinta kartida iyo aasaasidda xarumaha casriyeynta iyo tiknaloojiyadda nadiifka ah, sidalaguqeexay siyaasadda qaranka ee is badalka cimilada, si loo yareeyoqiiqa, loonakordhiyo maaliyadda cimilada, sababtoo ah xogta ay xarumahaasi soosaaraan ayaa taageeridoonta horumarinta mashaariicda la maalgelin karo.

Siyaasaddan maaliyadda cimilada waxaa dib loo eegidoonaaoo la kormeeridoonaa afartii sano mar, si loo qiimeeyo waxtarkeeda iyo ku habboonaanteeda wax ka qabashada arrimaha mudnaanta leh iyo kuwa soobaxaya ee maaliyadda cimilada eegudaha iyo caalamka.

# CUTUBKA KOOWAAD

# MAALIYADDA CIMILADA

## 1.0.Nuxurka Maaliyadda Cimilada Adduunka

Falcelinta adduunka ee is-baddelka cimilada waxaa lagu dhisay oo sees lagagadhigay saddex tiir oo kala ah; in la dhimooo la yareeyo qiiqa kaarboonka sihoos loogudhigo kulka adduunka (Yareyn-Mitigation), in la diyaariyo bulshada, hay'adaha, iyo kaabayaasha si lagagahortago saameynta is-baddelka cimilada ee taaganta iyo timaatada (Laqabsi-Adaptation), iyo in la isku-dabarido dhaqaalaha mudnaanta u leh si waxyaabahaani wax lagagaqabto (climate financing).[1]Qaab-dhismeedkaani waxaa lagudhisay oo sal lagagadhigay Heshiiska Hab-dhismeedka Qaramada Midoobayee Is-baddelka Cimilada (UNFCC), waxana loo qaabeeyay silamid ah heshiiyada cimilada kuwaasoo la dhisay tobankii sano ee lasoodhaafay.

Aragtida 'maaliyadda cimilada' waxa ay ka dhigantahay kheyraadka maaliyadeedee loo qoondeeyay waxkaqabashada saamaynta iyo is-baddelka cimilada. Waxa ay ka koobantahay ilo maaliyadeed iyo habab kala duwanoo ka imaanaayo dhinacyada kanaalada wadar-geesoodka (multilateral) Heshiiska Hab-dhismeedka Qaramada Midoobayee Is-baddelka Cimilada, kanaalada kale ee wadar-geesoodka, kanaalada labo-geesoodka (Bilateral), iyo kanaalada heer qaran iyo sidoo kagaarka ah. Waxa ay iskugujirtraa mid maxalli, mid qaran iyo mid ka gudbayso xuduudaha, kuwaasoo ka kooban deeqo, deyn, iyo damaanad dhoofin. Maaliyadda cimilada waxa ay mudnaan u leeyadahayoo ay caawinaysaa hirgalinta ajandayaasha caalamiga, gobol, iyo kuwa heer qaran, waana mowduuc aad lagagadoodo shirarka Qaramnada Midoobayee is-badelkacimilada. Mabda' laguheshiisay kunadhisan 'Mid guud, balseloogu kala saaray masuuliyadaha iyo awoodaha la tixgaliyay' wuxuu caddeynayaa in dhammaan dalalka ay mas'uul ka yihiin wax ka qabashada isbeddelka cimilada, haddana dalalka horumaray ay leeyihiin waajibaad maaliyadeed oo weyn aynatahay inay dalalka sookoraayo ka caawiyaan khayraadka maaliyadeed sin lagagadhabeeyo himilada UNFCCC.[2]

---

[1] *UNFCCC Process*
[2] *UNFCCC Introduction to Climate Finance*.

Heshiiska Paris (Paris Agreement) waxauu dib u xaqiijinayaa waajibaadka dalalka horumaray, waxa uuna dalalka kale kubogaadinayaa in ay kubiiriyaan wax-ku-darsiga tabarucaadka ah.Si loo fududeeyo bixinta maalgelinta cimilada, Heshiiska Qaab-dhismeedka Qaramada Midoobay ee Isbeddelka Cimilada (UNFCCC) wuxuu sameeyay hab maaliyadeed (financial mechanism) si uu dalalka sookoraayo ee qeybta ka ah heshiiska ugutaageero khayraad maaliyadeed. Habka maaliyadeed wuxuu sidoo kale u adeegsadaa heshiiska Kyoto iyo heshiiska Paris. Heshiisku wuxuu sheegayaa in hirgalinta qalabka maaliyadeed lagu aamini karo hal ama in ka badan ee hay'adaha caalamiga ah ee jira. Xarunta Deegaanka Adduunka (GEF) waxay u shaqeynaysay sidii hay'ad maamul ee habka maaliyadeed tan iyo markii heshiiska u udhaqangalay 1994. Shirkii COP16, 2010, dalalka waxay aasaaseen Sanduuqa Cagaaran ee Cimilada (GCF) sidoo kale waxaa sanadkii 2011 la isku raacay in aynoqoto hay'ad maamuloo u taagan habka-maaliyadeed. Hab kamaaliyadeed wuxuu u taaganyahay Shirarka Dalalka (COP), kaas oo go'aamiya siyaasadaha, mudnaanta barnaamijyada, iyo shuruudaha u-qalmitaankamaalgelinta. Dalalka waxay sidoo kale aasaaseen labo sanduuq oo gaar ah, Sanduuqa Isbeddelka Cimiladaee Gaarka (SCCF) iyo Sanduuqa Dalalkaugu Horumar-yar (LDCF), waxaana labadaba maamula GEF iyo Sanduuqa La-qabsiga (AF) oo lagua asaasay Heshiiska Kyoto ee 2001.

Shirka Isbedelka Cimiladaee Paris 2015, wxaa ay dalalka ku heshiiyeen in hay'adaha maamula o habka maaliyadeed, Sanduuqa Cagaaranee Cimilada (GCF) iyo Xarunta Deegaanka Adduunka (GEF), iyo sidoo kale Sanduuqa Isbeddelka Cimilada ee Gaarka (SCCF) iyo Sanduuqa Dalalkaugu Horumar-yar (LDCF), inay u adeegaanayna Heshiiska Paris. Iyadaoo loo raacaayo heshiisyada Cancun ee 2010, lanatixgalinaayo tallaabooyinka wax kuoolka ee laguyaraynaayo dhibaatada cimilada iyo in sihufan loo hirgaliyo, waxa ay sanadkii 2020 dalalka horumaray ballanqaadeen inay siwadajir ah dalalka soo-koraayo ugutaageeraan 100 bilyan oo doolar sanadkasto. Markii la ansixinayay Heshiiska Paris, xubnaha waxay aqbaleen yoolkan waxayna ugu baaqeen waddada lagugaari karo hiigsiga 2020. Si kastaba ha ahaatee, ballanqaadka maaliyadeedee 100 bilyan doolar ee dhamaadka sanadka 2020 lama helin, halka hiigsigaasi 2020 dib loo dhigayilaa 2025 iyo sidoo kale horumarinta Hadafka Wadareedka Cusub ee Maaliyadda Cimilada (NCQG). Waxaashirkii COP28 la aasaasay sanduuq waayidda iyo waxyeelada (Loss and Damage Fund) si loo taageero dalalka ay saameeyeen isbedelka cimilada.

### 1.1.Qulqulka Maaliyadda Lacagta ee Soomaaliya

Hirgalinta Wax-qabadka Qaran (NDC), istiraatiijiyadda qaran, iyo qorshayaasha qaran waxa ay u baahanyihiin maalgelin. Wax-qabadka Qaranee Soomaaliya waxa uu u baahanyahay isu-gaynta qarashdhan 16.3 bilyanoodoolar ama 2.3 bilyan doolar si sanadle muddo 7 sano oo u dhaxayso 2024 ilaa 2030, si loo hirgaliyo dhammaan tallaabooyinka lagamamaarmaanka ee laguxusay Wax-qabadka Qaran. Waxaa 8.8 bilyan oodoolar loo qorsheeyay la-qabsiga (Adaptation) halka 7.5 bilyan oo doolar loo qoondeeyay yaraynta (Mitigation).

Si loo fahmo tirooyinkaan, waxa ay Soomaaliya sanadkii 2020 heshay 285 milyan oo doolar halka ay baahideedu aheyd 3.4 bilyan oo doolar, wax ayna maalgelintaasi kagaimaanaysay dhaqaalaha horumarineed ee la xiriiro cimilada. Dhammaan lacagaha horumarineed ee ay Soomaaliya kasoogalay arrimaha la xiriiro cimilada waxa ay isu-gayntoodu tahay 1.5 bilyan oo doolar[3].Tani waxay muujinaysaa farqiga weyn ee u dhaxeeyo lacag sanadeedka ay Soomaaliya hesho ee 285 milyan oo doolar iyo lacagta loo baahanyahay ee 2.3 bilyan oo doolar sanad kasto. Jadwalka 2 iyo 3 waxay muujinayaan dhaqaalaha cimilada inta u dhaxaysay 2000 ilaa 2020 ee soogalo Soomaaliya iyo halka ay ka soogaleen.

[3] *ODA financing figures pulled from the OECD database*

**Jadwal 1: Qulqulka Maaliyadda Cimiladaee Soomaaliya (Milyan Doolar)**

| | | La-qabsi | Yarayn | Labo-ujeedo | Isu-gayn |
|---|---|---|---|---|---|
| Soomaaliya | Sanadkii u danbeeyay - 2020 | 260.8 | 3.7 | 20.2 | 284.8 |
| | 20-kii sano ee u danbeysay - 2000 ilaa 2020 | 1188.2 | 87.2 | 188.8 | 1464.2 |
| | 20-kii sano ee u danbeysay - 2000 ilaa 2020 | 548.8 | 258.8 | 79.3 | 886.9 |

**Table 2: Isha Maaliyadda Cimilada ee Soomaaliya**

**Isha: OECD DAC External Development Finance Statistics. Recipient perspective. 2020 and cumulative 2000-2020**

| Isha | Xaddiga [Milyan Doolar] | Isu-Gayntaboqollayda |
|---|---|---|
| World Bank | 108.7 | 38% |
| UK | 71.7 | 25% |
| Germany | 37.8 | 13% |
| Sweden | 16.1 | 6% |
| Netherlands | 15.3 | 5% |
| African Development Bank | 8.5 | 3% |
| Switzerland | 6.5 | 2% |
| Japan | 6.3 | 2% |
| Italy | 5.9 | 2% |
| Denmark | 3.1 | 1% |
| Bill & Mel Gates Fdn | 2.0 | 1% |
| Ireland | 1.5 | 1% |
| GEF | 1.2 | 0% |
| United States | 0.2 | 0% |
| Islamic Dev Bank | 0.1 | 0% |
| Grand Total | 284.8 | 100% |

Soomaaliya waxaa loo arkikaraa dal kuliito qorshaynta, helidda, gudbinta, kormeerka iyo warbixinta maaliyadda cimilada. Inkastoo dadaallo waaweyn la sameeyay toban kiisano ee la soodhaafay si loo dhiso qaab-dhismeedka hannaan maamul qaran, haddane waxaa weli xaddidan sameynta horumarin xooggan ee hay'adaha wax kuoolka ah ee ka bixikaro qorshaynta, helidda iyo maareynta dhaqaalaha. Waxaa loo baahanyahay awood horumarineed oo ballaaran si loo dajiyo qorshe wax kuool ah oo ku aaddan maaliyadda cimilada taasoo dalka gaarsiinkarto inuu helo lacagaha ka imanaayo ilobadan.

Tallaabada uguhorreysa ee muhiimka ah eedalka waa in la dhiso awoodda hay'adaha muhiimka ah ama Hay'adaha Fulinta ee Qaranka (NIEs) iya daoo la kobcinayo aqoontooda farsamoiyo sidoo kale heerarka maaliyadeed si ay ula kulmaan shuruudaha caalamiga ah. Siyaasaddani waxay u dhisantahay inay kaalin ka qaadato dadaallada dalka ee lagudhisayo deegaan hagaagsan oo u oggolaanaayo helitaanka iyo maareynta maaliyadda cimilada.

# CUTUBKA LABAAD

# HAB-DHISMEEDKA SIYAASADDA

## 1.0.Hadafka Siyaasadda

Hadafka Siyaasadda Maaliyadeed ee Qaranka Soomaaliyeed waxa ay ujeedadiisu tahay in la xoojiyo awoodda la-qabsiga ee lagu yareeynaayo, nuglaanshiyaha xagga cimilada, sii daynta qiica hawada iyo gaaska cagaaran, iyo soo jiidashada maal-gashi ballaaran iyo horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada ee lagu gaaro ballan-qaadka cimilada dalka ee ku aaddan Wax-ka-qabashada Qaran ee - Nationally Determined Contributions (NDCs).

Siyaasaddu waxay taageertaa kor u qaadida awoodda dalku u leeyahay helitaanka, abaabulka iyo ka faa'iidaysiga ilaha dhaqaalaha cimilada ee gudaha iyo dibadda, si loo taageero dadaallada iyo kasbashada Wax-ka qabashada ee (NDCs) taas oo lagu yareynayo awoodda la qabsiga iyo isbeddelka cimilada.

## 1.1.Hiigsi

Hiigsiga siyaasaddani waa joogtaynta u adkeysiga isbaddelka cimiladda, ayadoo si siman looga wada qayb qaadanayo gaarista xalka waara, iyo yareynta wasaqowga deegaanka, taas oo loo maraayo saadaal, ka falcelin, la qabsi iyo kasoo kabasho.

## 1.2.Ujeedka Siyaasadda

**Ujeedooyinka siyaasadda waa:**

1. In la sameeyo hab maaliyadeed oo lagu heli karo maaliyadda cimilada iyo barnaamjiyo wax ku ool ah kuwaas oo lagu taageerayo la qabsiga isbadellada cimilada ee Soomaaliya.
2. Isku-dubbaridka iyo abaabulka maaliyadeed ee cimilada, si loo gaaro hooseynta qiiqa hawada iyo horumarinta dagganaanta cimilada, iyada oo loo maraayo ilo gudaha ah iyo kuwa caalami.
3. In la dhiirigeliyo lana toosiyo hirgelinta maamulka maaliyadda gudaha si waafaqsan siyaasadda maaliyadda iyo maalgelinta cimilada.
4. In la xoojiyo abuurista jawi suurtagalin karo, maaliyadda cimilada iyo dhisitaanka awoodaha hay'adaha Soomaaliya, si ilaha maaliyadeed ee cimilada loogu helo maamul

hufan oo ay ka mid tahay in Wasaaradda Maaliyadda laga dhex sameeyo Sanduuqa Cimilada Qaranka iyo qoondo looga sameeynaayo, habka miisaaniyadda qaranka.

5. Ganacsiga iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo kuwa dowliga ahba waa in looga faa'iideyo lagana qeyb galiyo hanaanka maaliyadeed ee cimilada, si loo hormariyo wada shaqeynta xarumaha dowliga iyo kuwa aan dowliga ahayn .
6. In lagaaro isdhexgal bulsho, qorsheynta maaliyadda cimilada, qoondaynta, iyo hirgelinta iyada oo loo siman yahay isticmaalka kheyraadka, wax ka qabashada saameynta cimilada, lana xeerinayo kala duwanaanshiyaha haweenka iyo ragga, iyo horumarinta sinnaanta jinsiga iyo isdhexgalka bulshada.
7. In lala socdo lagana warbixiyo ilaha, adeegsiga, iyo saameynta maaliyadda cimilada.

### 1.3.Mabaadiida Siyaasadda Hago

Mabaadi'da soo socdo ayaa hagi doono hirgelinta siyaasadda maaliyadda cimilada:

a) **Lahaanshaha dalka:** Barnaamijyada iyo mashaariicda waa in ay leeyihiin oo ay wadaan dawladda iyo bulshada iyadoo la waafajinaayo mudnaanta iyo siyaasadaha qaranka.

b) **Is-waafajinta Hannaanka iyo Is-waafajinta Maaliyadda:** Habraacyada la xiriira marxalad kasta oo lagu heli karo maaliyadda cimilada waa in loo habeeyo hab istaraatiiji ah, isku xiran oo hufan taas oo dalka loogu talogalay. Maaliyadda cimiladu waa inay la socotaa qorshayaal qaran oo isku dhafan iyo qaab-dhismeedka siyaasadda federaalka ee maaliyadeed.

c) **Wax ka qabashada baahiyaha dalka iyo nuglaanta cimilada:** Waa in maaliyadda cimilada ay ka jawaabto baahiyaha gaarka ah iyo mudnaanta dawladda, oo ay ku jiraan bulshooyinka qabo baahida gaarka sidoo kalena aan awoodin helista dhaqaale, si waafaqsan yoolalka iyo ujeedooyinka. Heshiiska Paris, oo ay ku jiraan dadaallada lagu doonayo in lagu xaddido kor u kaca heerkulka 1.5°C iyo hagaajinta la qabsiga cimilada.

d) **Daah-furnaanta iyo la xisaabtanka:** Maaliyadda cimiladu waa in ay ahaato mid la saadaalin karo oo daah-furan oo keenta horumar la qiyaasi karo kuna wajahan awoodaha cimilada bulshada iyo ficilada iyo sidoo kale in la bixiyo qaab adag oo uruurinta iyo falanqaynta macluumaadka maaliyadda cimilada, taas oo u oggolaanaysa go'aan-qaadasho ku dhisan xog-ogaal ah iyo qoondayn wax ku ool ahsi wax lagaga qabto arrimaha la xiriiro cimilada.

e) **Iskaashiga Caalamiga ah:** in la kobciyo iskaashiga wax ka qabashada isbeddelka cimilada ee saaxadda gobolka iyo adduunka oo dhan iyadoo la tixgalinaayo waajibaadka qaranka.

f) **Adeegsiga ilaalinta deegaanka iyo bulshada:** In la siiyo habab kordhinaayo ilaalinta deegaanka iyo bulshada sidoo kale in laga faa'idaysto maaliyadda cimilada si wax lagaga qabto saamaynta taban ee cimilada.

g) **Habka Hirgelinta iyo Dib-u-habaynta Maamul-daadejinta:** Xaqiiji in tallaabooyinka la qaaday ay yihiin heer gobol iyo heer degmo. Marka la aqoonsanayo jinsiga kala duwan waxay la kulmaan caqabado kala duwan sidaas darteed waa in arrimaha jinsiga lagu dhex daro qorshaynta iyo hababka fulinta.

h) **Jinsiga, Sinnaanta, Cadaalada iyo Ka mid noqoshada Bulshada:** Hindisaha iyo mashaariicda maaliyadda cimilada waa inay la jaanqaadaan isbeddelka jinsiga iyo hannaanka bulshada u wada dhan tahay. Waa inay xaqiijiyaan helitaanka iyo qaybinta faa'iidooyinka, macluumaadka iyo taageerada loo siman yahay dadka la haybsooco iyo kuwa danyarta ah, iyagoo si firfircoon u aqoonsanaayo waxna looga qabanayo baylahdooda isbeddelka cimilada. Miisaaniyadda u adeegayso jinsiga iyo sinnaanta waa in la qaataa iyada oo ujeedadu tahay in kor looqaado sinnaanta jinsiga iyo ka mid noqoshada bulshada ee dhammaan hawlaha maalgelinta cimilada. Intaa oo la raaciyay wacyigalinta jinsiga iyo shuruudaha habka maaliyadda cimilada waxa ay fure u noqonayaan hirgelinta siyaasadda.

i) **Isku dheelitirka maaliyadda ee La-qabsiga iyo Yaraynta:** Maaliyaddeeda dheelli tiran ee muhiimka ah waxay siisaa in marin loo helo kheyraadka bulshooyinka u suurtagalinaayo inay hoggaamiyaan dadaallada la-qabsiga, dhisaan adkeysi oo ay kaga gudbaan xaalado deegaan oo aad u xun.

### 1.4.Adeegsiga

Siyaasaddani waxa ay taageeri doontaa hagidda shaqada hay'adaha dowliga ah, kuwa gaarka loo leeyahay iyo kuwa maaliyadeed, hay'adaha aan dawliga ahayn, iyo hay'adaha bulshada rayidka ah ee danaynaya inay ka qaybgalaan wax ka qabashada isbeddelka cimilada iyada oo loo maraayo hirgelinta siyaasadda iyo abaabulka arrimaha la xiriiro maaliyadda cimilada si wax looga qabto dhibaatooyinka la xiriiro arrimaha isbeddelka cimilada.

# CUTUBKA SADAXAAD

# MAALGELINTA IYO QEYBAHA MUDNAANTA LEH

## 3.0 Beeraha

Dhaqaalaha Soomaaliya waxaa ku badan qaybta aan rasmiga ahayn, taas oo ku saleysan shabakad ganacsi oo caalami ah oo ay maamulaan koox ganacsato maalqabeen ah. Dadka intooda badan waxay ku noolyihiin heer isku-filnaansho ah waxayna ku hawlan yihiin ganacsiyo yar-yar oo kala yihiin ganacsato iyo beeraley yar-yar ah. Ganacsiga gaarka loo leeyahay waxay aymujisay adkaysi iyo firfircooni meelaha sida isgaarsiinta, xoolaha, maaliyadda, biyaha, korontada, iyo kalluumeysiga. Shirkadaha gaarka loo leeyahay ee isgaarsiinta waxay bixiyaan adeegyo wireless ah inta badan magaalooyinka waaweyn, iyagoo ku bixiya qiimaha ugu hooseeya ee wicitaanka caalamiga ah ee qaaradda. Intaa waxaa dheer, jaaliyadda Soomaaliyeed ee dibedda ku nool waxay door muhiim ah ka ciyaareen dhaqaalaha iyagoo dhaqaale faro badan ku soo galiyay iyagoo adeegsanaya nidaam bangiyeed oo xaddidan.

Beeraha waa mid ka mid ah qaybaha ugu nugul ee cimilada ee Soomaaliya, iyadoo la xiriirta xiriirka dhow ee ka dhexeeya heerarka wax soo saarka beeraha iyo roobka. Ma jiraan tirokoob rasmi ah oo ku saabsan qaybtan, laakiin wax soo saarka dalagyada waa kan labaad ee ugu weyn xoolaha kadib (NDP, 2020-2024). Beeraleyda Soomaaliyeed waxay ku tiirsan yihiin beeraha roobka ku xiran, taas oo ka dhigaysa kuwo aad ugu nugul isbedelka cimilada daran, kala duwanaanshaha iyo saameynta isbedelka cimilada. Si isbeddelka loola qabsado, waxaa muhiim ah in la fahmo nuglaanta qaybta beeraha ee isbeddelka cimilada iyo kala duwanaanshaha.

Qaybaha xasaasiga ah ee cimiladu waa labada ilood iyo godka qiiqa GHG waxuuna si xun u saameeya isbedelka cimilada. Qaybta beeralaha gaar ahaan xoolaha, waxay u baahan doonaan inay la qabsadaan oo ay yareeyaan saamaynta isbeddelka cimilada iyo lama filaanka ah si loo hubiyo in cunto ku filan loo helo dadka koraya iyadoo kor loo qaadayo dhoofinta xoolaha iyo wax-soo-saarka dalagga si loo helo dakhli qalaad. Soomaaliya waxay leedahay masuuliyad yar oo taariikhi ah ama hadda jirta ee isbeddelka cimilada adduunka. Wadarta guud ahaan qiiqa GHG ee Soomaaliya (62.92 Mt CO2 ilaa 2015), qiyaastii 96% qiiqa ayaa ka yimid AFOLU.

Isticmaalka dhulka, is-beddelka isticmaalka dhulka, iyo qayb-hoosaadka kaynta (LULUCF) ayaa ah kuwa ugu muhiimsan ee khuseeya ka saarista. NDC-yada la cusboonaysiiyay waxaa ka mid ah qaybaha yaraynta iyo la qabsiga labadaba, soo bandhigaya tillaabooyinka iyo hababka loo baahan yahay in la qaado 2020-2030. Beeraha, isticmaalka dhulka kaymaha, tamarta iyo waaxaha qashinka ayaa awood u leh inay yareeyaan GHG-yada waxaana la filayaa inay Soomaaliya ka caawiyaan sidii ay u yareyn lahayd qiiqa GHG 30% marka la gaaro 2030 marka loo eego muuqaalka ganacsiga-sida caadiga ah. Qaybta beeruhu waxa ay bixisaa karti la taaban karo oo loogu talagalay is-kaashi ka mid ah yoolalka iyo ujeedooyinka falalka dhimista faqriga, sugnaanta cuntada iyo hab-nololeedyada, yaraynta iyo la qabsiga ficilada.

Sidaa darteed, waa in qaybtaan mudnaanta la siiyaa si loo horumariyo beeraha cimilada-caqli leh iyo hab-dhaqannada maamulka dhulka ee waara si loo yareeyo dayacanka cimilada loona xoojiyo adkaysiga cimilada iyada oo sidoo kale la dhimayo qiiqa ka imanaya qaybahan iyo kor u qaadista awoodda wax-soo-saarka beeraha.

**Bayaanka siyaasadda:**

1) In laga caawiyo bulshada xoolaha iyo beeralayda si ay u helaan dhaqaalaha cimilada ee ku haboon oo la awoodi karo la qabsiga iyo yaraynta iyadoo la isticmalaya teknoolajiyada iyo sarre u qaadida awoodda si ay u suurgasho  dadka saboolka ah, reer miyiga nugul, iyo qoysaska aan bangiyada lahayn ee u baahan adeegyada maaliyadeed yo helida dakhli, una yareeyaan khatarta, iyo ilaalinta dayacanka inta badan ka sii daraysa dhibaatooyinka dhaqaale, cudurrada sida aafooyinka caafimaadka, iyo masiibooyinka dabiiciga ah.
2) Taageerida qorshayaasha maareynta khataraha (tusaale, caymiska) ee ka dhanka ah isbeddelada saadka deegaanka, eek u hungoobida xoolaha iyo goosashada ama khatarta cimilada
3) Xoojinta iyo isbeddelka cimilada caadiga ah ee nidaamka balaarinta beeraha iyo xoolaha.
4) Samaynta iyo xoojinta deeqaha mashaariicda yar yar ee lagu taageerayo beeralayda si ay ula qabsadaan tignoolajiyada hormarsan, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn taranka abaarta u adkeysan kara ee la hormariyay; dhaqashada caanaha; dhamaystirka xoolaha oo hagaagay; wax-soo-saarka calafka iyo maaraynta, iyo horumarinta caafimaadka xoolaha iyo cudurrada.

5) Xoojinta hababka digniinta ee horay u jiray ee ku saabsan tayada xilli-beeraadka, xaalada daaqsimeedka, abaaraha, fatahaadaha, iyo cudurrada/cayayaannada dillaaca si kor loogu qaado u-diyaargarowga beeralayda.
6) Samaynta dugsiyo xoolo-dhaqato ah si loo xoojiyo tababarada beeralayda ee ku saabsan wax soo saarka iyo maaraynta calafka xoolaha, caafimaadka xoolaha iyo ka hortagga cudurada, iyo maaraynta seeraha.
7) In kor loo qaado Cimilo-beereed caqli badan leh iyo maamulka xoolaha, tusaale ahaan, dalagyada qiimaha sare leh ee u dulqadan kara abaaraha, xaddidaya dhaqdhaqaaqa xoolaha, goosashada biyaha ee wax soo saarka dalagga, iyo xoolaha, hababka waraabka wax ku ool ah: beeralayda, dhaqashada xoolaha, maamulka carrada, iyo nidaamka beeraha isku dhafan oo ay ku jiraan beero biyoodka.
8) Nidaamyada hubinta iyo dejinta qiimahadhoofinta xoolaha iyodalagga beeralayda
9) Horumarinta wax-soo-saarka gudaha, lagana mamnuuco soo dejinta dalagyada aan loo baahnayn si loo dhiirigeliyo wax-soo-saarka gudaha iyo dhiirigelinta kor u qaadista wax-soo-saarka iyo dhaqaalaha gudaha.
10) Sarre u qaadidagurashada ka dib iyo maaraynta dalagga iyo wax-soo-saarka kalluunka;
11) Ilaalinta iyo Xifdinta goobaha muhiimka ah ee kalluunka iyo goobaha taranka, iyo dib u kaydinta marka loo baahdo.
12) Horumarinta maalgashiga hab-dhaqanka maaraynta xoolaha ee waara, oo ay ku jiraan meelaha aan daaqsinka laheen ee magaalooyinka, maaraynta daaqsinka, iyo mideeynta daaqsinta iyo duurjoogta iyo xoolaha labadaba iyo kor u qaadida dalxiiska ee seeraha si loo kordhiyo waaritaanka, dakhliga, iyo adkeysiga waaxda xoolaha.
13) Maamulka dalagyada iyo daaqa oo la hormariyo si loo kordhiyo kaydinta kaarboonka ciidda; dib u soo celinta carrada la beeray iyo xaalufkadhulka; iyo maaraynta digada si loo badbaadiyo qiiqa $CH_4$, farsamooyinka dabaqida bacriminta nitrogen ee la hormariyay si loo dhimo qiiqa $N_2$, hormarinta dalagyada tamarta la hubo si loogu beddelo isticmaalka shidaalka fosil, iyo hagaajinta waxtarka tamarta.

## 3.1 Qaybta Biyaha

Soomaaliya waxay leedahay cimilo qallalan iyo cimlo- qeyb qallalan ah oo leh roobab sannadkii oo yar iyo uumi baxaheerar sare. Natiijo ahaan, khayraadka biyaha, oo ay ku jiraan webiyada, biyo-xireenada, iyo godadka biyaha hoostooda, way ku yar yihiin, gaar ahaan meelaha miyiga ah halkaasoo bulshada ay ku tiirsan yihiin biyaha roobka si ay u maareeyaan noloshooda. Biyo yaraanta waxay keentaa tartan ku saabsan helitaanka iyo isticmaalka biyaha, taasoo sii xumeyneysa khilaafaadka iyo xiisadaha ka dhex jira iyo ka dhexeeya bulshooyinka. Biyaha waa shuruud aasaasi ah nolosha iyo horumarka waara.Hase yeeshee, Aafooyinka cimilada ee Soomaaliya, sida biyo-la'aanta, roobabka aan joogtada ahayn, iyo fatahaadaha iyo abaaraha soo noqnoqda, ayaa ka qayb qaatay faqriga, barakaca, khasaaraha noolaha iyo colaadahaconflict[4]. Saamaynta aafooyinka ayaa si gaar ah ugu daran hab-nololeedyada xoola-dhaqatada-beeraleeyda iyo dhulka webiyada, taasoo horseedaysa wax-soo-saarka dalagga oo xumaaday, wax-soo-saarka xoolaha, iyo helitaanka biyaha muhiimka ah oo kooban.

Istaraatiijiyada Kheyraadka Biyaha Qaranka (NWRS) waxay aqoonsan tahay doorka muhiimka ah ee qaybta biyaha si ay u taageerto horumarinta dhaqan-dhaqaale iyo baahida loo qabo in sare loo qaado u adkeysiga waaxdu saamaynta isbeddelka cimilada. Istaraatiijiyadu waxay mudnaan siinaysaa horumarinta kaabayaasha biyaha, oo ay ku jiraan dhismaha biyo-xireennada iyo kaydadka, dib-u-habaynta kaabayaasha jira, iyo maalgelinta hababka daaweynta iyo qaybinta biyaha. Hirgelinta faragelintan mudnaanta leh waxay u baahan tahay ilo dhaqaale oo muhiim ah; sidaas darteed, siyaasadda maalgelinta cimiladu waa inay diiradda saartaa abaabulka ilaha dhaqaale ee ilaha gudaha iyo kuwa caalamiga ah si loo taageero hirgelinta waxqabadyada mudnaanta leh ee qaybta biyaha.

Soomaaliya ayaa wajaheysa caqabado waaweyn oo dhanka biyaha ah taas oo ay ugu wacan tahay saameynta isbedelka cimilada. Wax ka qabashada caqabadahan waxay u baahan tahay dadaallo isku dhafan, oo ay ku jiraan maalgelinta kaabayaasha biyaha ee adkaysiga leh, hagaajinta maamulka iyo maaraynta biyaha, kobcinta awoodda, iyo kordhinta helitaanka dhaqaalaha cimilada. Waxay sidoo kale u baahan tahay iskudubarid wax ku ool ah oo ka dhexeeya hay'adaha qaranka iyo kuwa maxalliga ah, iskaashiga xuduudaha leeskaga gudba, iyo ka qaybgalka bulshada si loo hubiyo in  maamulka khayraadka biyaha ee adkaysi u leh isbedelka cimilada ee waara.

[4] *MoPIED 2020*

Sanduuqa Cimilada Qaranku waa hannaan ka taageera waddammada si ay u maareeyaan ka-qaybgalkooda maaliyadda cimilada iyada oo fududaynayso ururinta, isku-dhafka, isku-dubbaridka, iyo lasocoshada maaliyadda cimilada ee dalka . Sanduuqa Cimilada Qaranka(NCF) waxa uu bixiyaa nidaam uu wadanku kusocdo kaas oo taageeri kara dejinta yoolka isbedelka cimilada iyo barnaamijka istiraatijiyadeed, kormeerida, ansixinta mashaariicda isbedelka cimilada, cabirida fulinta mashruuca iyo waxqabadka, bixinta, hubinta siyaasada iyo xakamaynta maaliyadeed ee lacagaha isbedelka cimilada iyo ka caawinta maaraynta iskaashiga.

Sanduuqa Cimilada Qaranku waxa uu ka caawiyaa waddammada in ay si wada jir ah isugu daraan kheyraadka kala duwan ee heer qaran, iyaga oo siinaya hab awoodda looga wareejinayo maaraynta maaliyadda sare ee soo jireenka ah una guuraan maaraynta heerka waddanka. Ujeedooyinka isbeddelka cimilada ee waddan waa la maareeyaa waxaa laga taageeraa gudaha ee ma ahan oo kaliya ma ahan in bananka laga mamulo. Sidaa awgeed, samaynta Sanduuqa Cimilada Qaranka(NCF) waxa ay u baahan tahay in si taxadar leh loo tixgeliyo ujeeddooyinkeeda ka dibna la sameeyo qaab-dhismeed taageeraya gaaritaanka ujeedooyinkan. Qaar badan oo ka mid ah Sanduuqa Cimilada Qaranka ayaa bixiya adeegyo caadi ah. Si kastaba ha ahaatee, qaybaha saxda ah iyo qaababka lagu bixiyo adeegyadu aad ayay u kala duwan yihiin marka loo eego duruufaha iyo mudnaanta qaranka. Si kale haddii loo dhigo, habka loo qaabeeyey qaybaha lacagta ayaa qaabeeya sida lacagta cimilda qaranka udabosho tageeridda.

Tusaale ahaan, Sida Sanduuqa Cimilada Qaranka (NCF) ee ay ka faa'iidaysatayn ama uga helayn malgalin lacageed maaliyadda guud ee caalamiga ah iyo tan qaranka ayaa ururin doonta oo isku dhafi donto kheyradka kala duwan Sanduuqa Cimilada Qaranka (NCF) oo ku tiirsan oo keliya maaliyadda gaarka ah. farsamo iyo habab maaliyadeed oo habaysan ayaa loo baahan doonaa in si wax ku ool ah loogana gudbiyo ilaha dadweynaha iyo kuwa gaarka ah.

Intaa waxaa dheer, iyadoo ay ku tirsantahy qaababka kaladuwan ee maalgalineed, ee Sanduuqa Cimilada Qaranka waxaa laga yaabaa in ay xoojiso awoodaha daneeyayaasha qaranka, oo ay ku jirto helitaanka tooska ah ee maaliyadda cimilada. Sanduuqa Cimilada Qaranka (NCF) waxay ka faa'iidaysan karaan lacagaha dowladda si ay u soo jiitaan maaliyad gaar ah oo ay u bixiyaan isku-dubarid heer-qaran oo ka mid ah inay wafaqdo nidaamka maaliyadda cimilada adduunka.

### 4.1.1 Ujeedada Sanduuqa Cimilada Qaranka

1) Uruurinta ilaha dhaqaalaha iyo ku jiheenta hawlaha isbeddelka cimilada ee kor u qaadaya mudnaanta qaranka
2) In la fududeeyo isku dhafka maaliyadda ee ilaha dadweynaha, kuwa gaarka ah, dhinacyo badan iyo labada dhinacba e ilaha si loo kordhiyo awoodda waddanku u leeyahay horumarinta mudnaanta cimilada qaranka.
3) Isku duwidda hawlaha isbeddelka cimilada ee waddanka oo dhan si loo hubiyo in mudnaanta isbeddelka cimilada si hufan loo fuliyo.

4) Xoojinta awoodaha lahaanshaha qaranka iyo maaraynta maaliyadda cimilada, oo ay ku jirto hay'adaha fulinta qaranka "helitaanka tooska ah" in lamal galiyo.

### 4.1.2 Hawlaha Muhiimka ah ee Sanduuqa Cimilada Qaranka

Sanduuqa Cimilada Qaranka (NCF) waa inuu taageeraa dejinta yoolka iyo horumarinta qorshoyinka barnaamijka

5) Sanduuqa Cimilada Qaranku waa inuu bixiyaa dhaqaale ururin dhanka mudnaanta cimilada
6) Sanduuqa Cimilada Qaranku waa inuu bixiyaa hab lagu maareeyo iskaashiga isagoo si cad u qeexaya iyo isku dubaridka doorarka daneeyayaasha kala duwan ee isbedelka cimilada.
7) Sanduuqa Cimilada Qaranka (NCF) waa in uu bixiyo ogolaanshaha mashruuca isku dubaridan iyo qaab dhismeedka fulinta barnaamijyada isbedelka cimilada. Bixi ansixinta mashruuca iyo in la taageero hirgelintisa
8) Sanduuqa Cimilada Qaranka (NCF) wa inu bixiyaa xaqiijin siyaasadeed iyada oo loo marayo ilaalinta bulshada iyo deegaanka, hubinta maaliyadeed taaso xaqijineso la socodka maaliyadeed iyo warbixinta iyo cabbiraadda waxqabadka taas oo qeexaysa shuruudaha waxqabadka gaarka ah ka dibna qiimeeya mashaariicda iyo barnaamijyada si loo hubiyo in Sanduuqa Cimilada Qaranka (NCF) ay u garsiso si wax ku ool ah oo hufan.
9) Sanduuqa Cimilada Qaranka (NCF) waa in ay noqotaa il maareyn aqooneed iyo xog maareyn muhim ah oo isku xirta oo na faafisa casharrada/hababka dhanka mashaaricda isbeddelka cimilada iyo barnaamijyada.
10) Sanduuqa Cimilada Qaranka (NCF) waa in ay maamusho cabbiraadda waxqabadka, oo ay ku jiraan la socodka iyo ka warbixinta hawlaha iyo bixinta kheyraadka.

### 4.1.3 Qaab-dhismeedka Sanduuqa Cimilada Qaranka

Dowladda Soomaaliya ayaa magacaabi doonta khubaro farsamo si ay u qaabeeyaan sanduuqa cimilada Qaranka ee ku habboon oo leh doorar iyo mas'uuliyad cad iyadoo loo marayo hannaanka wadatashiga dhammaan jileyaasha cimilada ee dalka oo dhan.Iyadoo lagu salaynayo casharadii laga bartay ama qababka ugu wanagsan ee laga soo qaatay wadamada kale iyo duruufaha dalka, nashqada iyo qaab dhismeedka sanduuqa cimilada qaranka ayaa laga yaabaa in la tixgaliyo si loo hubiyo in habka ku haboon oo wax ku ool ah oo NCF ah la sameeyo kaas oo kordhinaya bixinta dhaqaalaha cimilada si loo taageero. mudnaanta qaranka: ujeedooyinka, malgalineed, maamul wanaaga maamulka oo sharci ah, qababka fulinta iyo la socodka, ka warbixinta , iyo xaqiijinta

(MRV). Go'aamada muhiimka ah ee qayb kasta oo maalgelin ah waa in loo tixgeliyo NCF si ay u gaarto yoolalka iyo hawlaheeda asaasiga ah.

## 4.1.Qaab-dhismeedka Sharci iyo Nidaaminta

**Bayaanka Siyaasaded:**

Marka la eego dabeecadda is-beddelka cimilada ee guud, siyaasad dabacsan oo dhammaystiran iyo dib-u-habeyn sharciyeed waxay awood u siin doontaa isbeddelka cimilada Soomaaliya iyo hirgelinta waxqabadkeeda kag’o nashada kaqebqadasho ee isbedelka cimilada qaran -NDC.

Dib-u-eegista, cusboonaysiinta, iyo socodsiinta maaliyadda cimilada ee shurucda qaranka ee dakhli ururinta iyo maaliyadda dadweynaha ayaa muhiim u ah abaabulka kheyraadka cimilada ee loo baahan yahay.

**Waxqabadyada:**

a) In la lagarto qaab-dhismedka caqabadaha sharci iyo sharciyeen ee wiiqi karta hay'adaha maaliyaded iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay maalgashiga u adkeysiga cimilada, kaarboon-yar iyo soo jeedin xalal kale ;,
b) Kobcinta hawlgelinta Siyaasadda Qaran ee Isbeddelka Cimilada, 2020.
c) Dejinta sharciga maaliyadda ee cimilada oo ah cunsur muhiim ah ee looga baahan yahay nidaamka isbeddelka cimilada caalamiga ah, As aaska qaab-dhismeedka sharci-dejinta ee awood u leh si loo hirgeliyo NDC iyada oo la ansixinayo qaab-dhismeed gooni-gooni ah, oo guud ahaan ah Sharciga Isbeddelka Cimilada waafaqsan,
d) Dhiirigelinta wax ka bedelka siyaasadaha iyo sharciyada Qeeybaha muhiimka ah ayaa looga baahan doonaa si ay u waafajiyaan qaab dhismeedka sharciga isbeddelka cimilada iyo in la hubiyo in dhammaan falalka hoos yimaada kago’ nashada kaqebqadasho qaran NDC ay leeyihiin aasaas sharci si loo fuliyo loogana turjumo fikrado ku dhaqan leh . Tan waxa ku jiri kara siyaasado lagu horumarinayo maalgashiga cagaaran ee qaybaha sida tamarta, gaadiidka, dhismaha iyo beeraha,
e) Horumarinta hawlaha cimilada dalka oo dhan; waxaa jirta baahi loo qabo in siyaasadaha isbeddelka cimilada iyo qaab-dhismeedka sharci-dejinta lana socoto ansixin ama ay aqbalaan dhammaan dawladaha xubnaha ka ah federaalka si habsami leh loo hirgeliyo.

f) Miisaaniyad qaran oo loo qoondeeyay barnaamijyada isbeddelka cimilada iyada oo loo marinayo sanduuqa cimilada qaranka.
g) In la dhiso guddiyo heer federaal iyo heer gobol ah oo qaabilsan abaabulka kheyraadka cimilada taas oo qayb ka ah istaraatiijiyadda abaabulka kheyraadka.

## 4.2.Horumarinta Awoodda Hay'adaha

**Bayaanka Siyaasaded:**

Soomaaliya malahan awoodo hay'addeed oo ku filan si ay uga jawaaban dhammaan heerarka maalgelinta isbeddelka cimilada iyo kagonashada kaqebqadashada qaran (NDCs) Nidaamyada hay'adaha daciifka ah ee wax ka qabashada isbeddelka cimilada ayaa weli ah caqabad ku ah abaabulka kheyraadka iyo hirgelinta kagonashada kaqebqadasho qaran ee isbedelka cimilada (NDC) ee dalka. hadafka horumarinta awoodaha hay'adaha waa inay kor u qaadaan hagajinta maamulka isbeddelka cimilada wax ku ool ah oo hufan oo leh kormeer heer sare ah iyo jiheen siyaasadeed, isbeddelka cimilada ee guud ahaan dawladda; awood fulinta iyo u hoggaansanaanta; ku lug lahaanshaha heer dawladeed; madasha talobixinta daneeyayaasha; iyo bixinta khubaro farsamo oo aad ugu takhasusay.

**Waxqabadyada:**

a) Kor uqadista helitaanka maaliyadda cimilada caalamiga ah iyo labada dhinac iyada oo loo marayo isku xirka wasaaradaha ay khusayso si loo horumariyo hindise-sharciyeedka wadajirka ah oo loo maro mudnaanta wasaaradaha. Kor u qaadida awoodda si loo abuuro hab lagu ogaado mashaariicda socoto iyo saamiga maalgelinta kuwaas oo loo soo bandhigi karo ilo maaliyadeed oo kala duwan.
b) In la fuliyo qiimaynta aasaasiga ah ee baahiyaha kartida qaranka ee arrimaha la xidhiidha maalgelinta cimilada ee dhammaan hay’adaha ay khusayso, oo ay ku jiraan Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada, wasaaradaha iyo hay’adaha dawladda ee ay khusayso iyo waaxaha heer-goboleed ee u xilsaaran arrimaha isbeddelka cimilada.
c) In la xoojiyo kobcinta tayada hay’adaha mudnaanta leh ee heer qaran iyo heer federaal iyo heer deegaan ee arrimaha la xiriira maamulka maaliyadda, halbeegyada aaminaad (wakiil) iyo ilaalinta deegaanka iyo bulshada.

d) Kor u qaadida ama kor u qaadida/hormarinta iyo hirgalinta la dagaalanka musuq-maasuqa, daah-furnaanta, isla xisaabtanka iyo habab dhawrsanaan oo gaar ah si loo ilaaliyo maaraynta dhabta ah ee dhaqaalaha cimilada.

e) In la sameeyo barnaamij awood-dhis ah oo heer qaran iyo heer dawlad-goboleed ah si looga caawiyo hay'adaha dawladda ee mudnaanta leh, hay'adaha maaliyadda, kuwa mashaariicda horumariya, iyo bulshada rayidka ah horumarinta mashaariicda bangiyada.

f) Qaabdhismeedka iskuxirka ee lagu soo jeediyay siyaasadda isbeddelka cimilada qaranka ee 2020 in lagu hawlgeliyo wakhtiga ugu yar ee suurtogalka ah. Tallaabooyinka horumarinta awoodda waa in ay ku jiraan awoodaha si buuxda loogu beddelo isbeddelka cimilada ee qorshaynta iyo hababka miisaaniyada iyo dadaallada lagu hagaajinayo awoodda hawlgelinta iyo hilidda ee lacagaha isbeddelka cimilada iyada oo loo marayo mashaariicda ay fuliyaan dawladda iyo qeybaha kale.

g) In la hormariyo barnaamij awood-dhis ah oo lagu caawinayo hay'adaha maaliyadeed ee qaranka iyo kuwa maxalliga ah inay qiimeeyaan khataraha tignoolajiyada cusub ee cimilada la xidhiidha iyo qaabaynta halabuur/hindiso maaliyadeed oo cusub si ay u taageeraan qaadashada warshadaha.

h) In la qiimeeyo jawiga maalgashiga gudaha iyo in la kordhiyo wacyiga iyo awoodda ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo hay'adaha maaliyadeed. Qaybta gaarka loo leeyahay waa in la siiyaa macluumaad lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan doorkooda iyo fursadaha maalgashiga cimilada muddada-dheer iyo dhexe ee qaybaha kala duwan ee dhaqaalaha iyo doorashooyinka tignoolajiyada waara ee kala duwan.

i) In la horumariyo barnaamijka dalka iyo khariidad lagu hirgelinayo. Dawladdu waa inay hogaamisaa nidaamka barnaamijka dalka soo koraya, kaas oo siinaya qaabeynta daneeyayaasha muhiimka ah si ay u helaan dhaqaalaha cimilada iyo bartilmaameedyada mudnaanta leh ee ilaha dhaqaalaha cimilada kala duwan iyo la-hawlgalayaasha fulinta.

j) watreejinta caqabadaha dhaqaalaha iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay si loo xoojiyo u hoggaansanaanta shuruudaha maaliyadda cimilada sida heerarka kalsonanat, maareynta khatarta, ilaalinta deegaanka iyo bulshada, siyaasadda jinsiga iyo xeerarka sharciga si loo diyaariyo loona helo maaliyadda cimilada.

k) Hormarinta habraacyada is dhexgalka jinsiga ee qorsheynta, miisaaniyad-samaynta iyo hirgelinta maal-gelinta/falalka cimilada.

### 4.3.Qaab-dhismeedka Maamulka iyo Hay'adaha

**5. Bayaanka Siyaasaded:**

Iyadoo la tixgelinayo muhiimadda isbeddelka cimilada ee Soomaaliya, kadhabenta abuurista Sanduuqa Isbeddelka Cimilada ee Soomaaliya (SCF) ayaa muhiim u ah Soomaaliya si ay u diyaariyaan kheyradka ama howlaha lagama maarmaanka u ah isbeddelka cimilada iyo hirgelinta kago nashada kaqebqadasho ee qaran ee isbedelka cimilada (NDC-da.) Ujeedadu waa in la soo mariyo kheyraadka iyada oo loo marayo hannaanka miisaaniyadeed, SCF-na waxa ay yeelan doontaa caddayn badan oo ujeeddo ah oo u oggolaanaysa horumarinta khibradda qaranka iyo daahfurnaanta maalgelinta cimilada. Marka loo eego sii wadista ama kordhinta habka ay wada-hawlgalayaasha horumarku hogaaminayaan, SCF waxa ay bixin doontaa fursado badan oo muhiim ah oo lagu waafajiyo mudnaanta qaranka (mabda'a 'lahaanshaha'). Waxaa jira caqabado la qirsan yahay in loo isticmaalo lacagta si loo soo mariyo kheyraadka dadweynaha, laakiin kuwan waxaa looga gudbi karaa naqshad taxaddar leh.

**Waxqabadyada:**

a) Magacaabista hay'ad qaran oo la aqoonsan yahy la aminsanyahay oo karti leh (NIE) iyo la-hawlgalayaasha fulinta si ay si toos ah u helaan mashaariicda/barnaamijyada maalgelinta cimilada ee caalamiga ah ee dalka, sida GEC iyo GEF,

b) Yaglelidda iyo Hawlgelinta Sanduuqa Isbeddelka Cimilada ee Soomaaliya qaab-dhismeedka sharci ee jira ama la hormariyay sharci cusub sida Xeerka Isbeddelka Cimilada, si loo taageero maalgelinta hawlaha si sharci ah.

c) Xoojinta iyo hawlgelinta guddiyada waxyaha badan iyo danayesha guud si ay u hagaan geeddi-socodka lagu yagleelayo malgalinta, sida wasaaradaha iyo guddiga farsamada ee ay ku taliyeen siyaasadda isbeddelka cimilada qaranka ee 2020. Guddigu waa in uu yeesho wakiillo sare oo ka socda dawladda ( federaal iyo Heerarka dawlad-goboleedka), Ururada Bulshada Rayidka ah iyo qaybaha gaarka loo leeyahay, iyada oo ay suurtogal tahay ka qayb-qaadashada la-hawlgalayaasha  horumarinta.

d) Sanduuqa waxa kale oo uu u howlgalaya sidii hab isku xidhka maaliyadda cimilada si loola socdo socodka dhaqaalaha cimilada ee dalka. Doorka isku xidhka sanduuqa waxa la filayaa in uu ku xidho nidaamyada isku xidhka deeq bixiyayaasha ee Wasaaradda Qorshaynta. Lahaanshaha sanduuqa cimilada qaranka oo si buuxda u shaqeeya waxa ay u gogol

xaaraysaa lacagta heerka dawlad-goboleedka ee isbeddelka cimilada, halkaas oo xubnuhu ay ku asasi karaan unugyo maalgelinta cimilada oo u qaas ah oo ay u diyariyaan agabka hirgelinta tallaabooyinka cimilada.

e) Waa in si cad loo sheegaa oo la isku duwo doorarka iyo waajibaadka guddiga. Hawlaha guddiga waxaa ka mid ah in ay ansixiyaan habka maamul ee ugu waxtarka badan ee Sanduuqa, horumarinta iyo ansixinta hababka sharci iyo xeerarka Sanduuqa, oo ay ku jiraan habraaca iyo siyaasadaha Sanduuqa, horumarinta Shuruudaha tixraaca iyo qorista shaqaalaha Sanduuqa . Wasaaradda Maaliyadda ayaa guddoomineso guddiga

f) Dhisidda iyo ogolanshaha dhismaha awooddaha laxariira hufnaanta ee dalka si joogto ah iyo sida uu qabo axdigu.

g) Xoojinta iyo iswaafajinta wadoyinka kala duwan ee maaliyadda cimilada iyo horumarinta iyo dhaqan galinta hababka hawlgelineed ee wadanka hormarinayo si loo diyariyo qeyraadka, qoondaynta iyo qaybinta lacagaha la helay.

### 4.4 Qaab dhismeedka Soo jiidan kara horumarinta Maaliyadda Cimilada

**Bayaanka Siyaasaded:**

Dawladdu waxay soo jiidan doontaa malgalinta dhaqale e cimilada waxayna kor u qaadi doontaa maalgashiga cimilada iyada oo loo maraayo hanaan sisaasaded maaliyadeed iyo dhaqaale iyo habab iskaashi ku salaysan oo faa'iidooyinka iyo khatarta si siman loogu qaybiyo.

**Waxqabadyada:**

a. Kor u qaadida iyo dhiirigelinta in ay khibrado ka bartaan wadamada kale si loo gaaro istaraatiijiyooyinka horumarinta kaarboon-yareenta ee qaranka, oo ay ku jiraan yareenta qiiqa.

b. Ka shaqaynta hananak maaliyadda cimilada (Sanduuqa Isbeddelka Cimilada), hormarinta istaraatiijiyad lagu aqoonsanayo ilaha dhaqaalaha cimilada. Istaraatiijiyadu waxay sahmin doontaa dariiqooyinka suurtogalka ah ee lagu soo jiidan karo dhaqaalaha cimilada gudaha iyo dibadda, oo ay ku jiraan maalgelin shisheeye oo toos ah iyo maalgelin dhinacyo badan ama laba geesood ah.

c. In la dejiyo hanan iyo heerar lagu dheelli tiro qoondaynta dhaqaalaha cimilada ee la diyaariyay si loola qabsado loona yareeyo dadaalada cimilada.

d. Iyada oo la taageerayo hananka maaliyadda cimilada (Sanduuqa Isbeddelka Cimilada), xoojinta kor u qaadista maaliyadda cimilada iyada oo loo marayo iskaashi istiraatijiyadeed oo lala beegsaday saaxiibo laba geesood ah iyo kuwo dhinacyo badan leh.
e. Xoojinta "helitaan toos ah " maalgelinta cimilada iyada oo kor loo qaadayo wacyigelinta iyo kobcinta awooda si loo horumariyo heerarka aamindda, maaraynta mashruuca iyo ilaalinta deegaanka iyo bulshada dhexdeeda xarumaha mudnaanta leh.
f. Hormarinta qalab maaliyadeed ee dadweyne oo adag oo lala janqaadi karo si loo taageero loogana faa'iidaysto maalgashiga ganacsiga gaarka loo leeyahay ee kaarboon-yareenta iyo waxqabadyo u adkaysta cimilada.
g. Kor u qaadida kalsoonida maalgashadayaasha iyo ka qayb qaadashada hababka suuqa ku salaysan, iyada oo diirada la saarayo suuqa kaarboonka iskaa wax u qabso ah ee mudada gaaban iyadoo loo diyaarinayo hanaankii laysku raacay heshiiskii Paris.
h. In la fududeeyo ka qaybgalka Soomaaliya ee qaabaynta iyo hirgelinta habab iskaashi iyo habab ku salaysan suuqa.
i. Sara uqadista awoodda iyo horumarinta, hirgelinta iyo ka warbixinta hindisayaasha lagu taageerayo dhaqaalaha ku salaysan waxqabad, gaar ahaan la xariira mashaariicda dhirta.
j. In la sameeyo habab cusub oo loogu talagalay diyarinta kheyraadka dheeraadka ah, sida deegaan cagaaran.

# CUTUBKA SHANAAD

# DHAQAN GALINTA SIYAASADDA

## 5.0.Hordhac

Qaybtani waxay ka hadlaysaa maamulka siyaasadda malgalinta cimilada waxayna dabooli doontaa; hirgelinta, habaynta hay'adaha iyo doorkooda, kobcinta awoodda iyo kormeerka iyo qiimaynta.

## 5.1.Dhaqan galinta Siyaasadda

Wasaaradda Deegaanka iyo Isbedelka Cimilada waa in ay ahaato hay’adda hormuudka u ah una qaabilsan siyaasadda maaliyadda qaranka ee Soomaaliya si dhowna ula shaqeyso dhammaan jileyaasha cimilada oo ay ku jirto Wasaaradda Maaliyadda. Wasaaradda Deegaanka iyo Isbadalka Cimilada waa in ay diyaarisa hab ama siyaasad ku filan si loogu guulaysto fulinta siyaasada iyo horumarinta shuruucda iyo xeerarka loo baahan yahay. Waxqabadyada istiraatijiyadeed ee lagu muujiyay cutubka 4aad waxaa hawlgelin doona Wasaaradda Deegaanka iyo Isbedelka Cimilada iyo la-hawlgalayaasheeda, oo ay ku jiraan labada xubnood ee dawladda dhexe iyo kuwa federaalkuba, iyaga oo ku daraya tallaabooyinka gaarka ah ee qorshahooda istiraatijiyadeed iyo hawl-qabad haddii ay horeba u jireen. Haddii kale, waa in lagu horumariyo halka ay suurtagal tahay.

Qorshayaasha cimilada waxaa la siin doonaa macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan tallaabooyinka gaarka ah ee lagu xisaabtamayo iyadoo lagu saleynayo baahiyaha iyo mudnaanta, wakaaladaha fulinta, iyo waqtiga iyo kharashka loo baahan yahay maalgashiga.

## 5.2.Hagajinta  Hay'adaha

Hay’adaha dawladda ee muhiimka ah iyo daneeyayaasha ku hawlan gaarsiinta siyaasadda maaliyadda cimilada waa sidan;

**Kormeerka, HirgelintaiyoDabagalka**

Hay’adaha dawladda ee uguwaaweyn ee kuhawlan kormeerka, hirgelinta iyo daba-galka siyaasadda nmaaliyadda cimilada ayaa lagusheegay hoos;

a) Guddiga siyaasadda heerka sare ee Isbeddelka Cimilada Qaranka (Golaha Wasiirada), oo lagu dhisay siyaasadda qaranka ee cimilada sanadka 2020, uuna guddoomiye u yahay ra'iisul wasaaraha, ayaa hagi doona hirgelinta siyaasaddan maaliyadda cimilada waxayna heli doonaan ugu yaraan warbixinnada labadii sano ee la soo dhaafay. waxqabadka Siyaasaddan. Waajibaadka golaha waa in uu bixiyo jihaynta sharci-dejinta iyo siyaasadda, kormeerka, indha indheyn iyo hagidda isbeddelka cimilada ee dhammaan heerarka dawladda. Goluhu wuxuu maamuli doonaa hananka maaliyadda cimilada (Sanduuqa Isbeddelka Cimilada), oo ay ku jiraan oggolaanshaha codsiyada maalgelinta, samaynta go'aannada qoondaynta maalgelinta, iyo hagaajinta dabagalka iyo isku-duwidda maaliyadda cimilada.
b) Wasaaradda Deegaanka iyo Isbedelka Cimilada ayaa noqon doonta masuulka koowaad ee dhammaan arrimaha maaliyadda cimilada waxayna mas'uul ka tahay guud ahaan hirgelinta siyaasaddan maaliyadda cimilada. Wasaaradda Deegaanka iyo Isbedelka Cimilada waxay dejin doontaa sanduuqa Cimilada Qaranka ee loogu talagalay maaliyadda cimilada waxayna isku dubaridi doontaa oo fududayn doontaa hawlaha maaliyadda cimilada, oo ay ku jiraan hawlaha Guddiga Hagidda ee Wasaaraddaha dhexdoda.
c) Wasaaradda deegaanka iyo isbeddelka cimiladu waa inay sidoo kale talo farsamo iyo adeegyo ku saabsan isbeddelka cimilada siisaa Golaha Cimilada Qaranka.
d) Guddiga Hagidda ee Wasaaraddaha, oo sida ku habboon ula shaqaynaya habka maaliyadda cimilada (Sanduuqa Isbeddelka Cimilada), waa in ay dawladda u fidiyaan adeegyo la-talin ah, oo ay ku jiraan Golaha Cimilada Qaranka ee maaliyadda cimilada. Guddigu wuxuu ka koobnaan doonaa wakiillo ka socda wasaaradaha ay khusayso (sida lagu qeexay wareegtada rasmiga ah ee guddiga) iyo wakiillo ka socda qaybaha gaarka loo leeyahay, bulshada rayidka ah iyo tacliinta.

- **Dawladahaxubnaha ka ah federaalka iyo wasaaradaha kale ee dawladda, wakaaladaha iyo waaxyaha**

Wasaaradaha iyo hay’adaha kale ee dawladda ee doorka lama huraanka ah ka qaata hirgelinta siyaasaddan maaliyadda cimilada ayaa lagu xusay hoos.

a) Wasaaradda u xilsaaran tamarta iyo biyaha waa inay ka taageertaa dhammaan arrimaha khuseeya tamarta iyo biyaha ee siyaasaddan maaliyadda cimilada.

b) Wasaaradda u xilsaaran Beeraha iyo Waraabka iyo Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo Kalluumaysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ahi waa inay ka taageeraan dhammaan arrimaha Xoolaha, Beeraha iyo Kalluumaysiga ee ku jira Siyaasadda Maaliyadda Cimilada.

c) Wasaaradaha xubnaha ka ah dawladda dhexe ayaa noqon doona marinka koowaad ee dhammaan arrimaha maaliyadda cimilada ee gobollada/goboleedyada.

d) Dawladaha hoose waa in ay ku xisaabtamaan dhaqaalaha cimilada dadaalkooda ku wajahan is bedelka cimilada ee degmada iyo Qorshayaasha Horumarineed ee isku dhafan, iyaga ooku xisabtamaya mudnaanta heer qaran iyo heer gobol.

e) Hay'adda masuulka ka ah loona xilsaaray maaraynta abaaraha iyo dhimista khatarta masiibooyinka waa in ay hubisaa in arrimaha maaliyadda cimilada ay ku dhex jiraan qorshayaasha maaraynta abaaraha iyo in saamaynta isbeddelka cimiladu si waafi ah wax looga qabto barnaamijyada maalgelinta si loo xaqiijiyo ilaalinta cimilada.

f) Hey'adda qaran ee isbedelka cimilada eeku xusanHeshiiska Qaab-dhismeedka Qaramada Midoobay ee Isbeddelka CimiladaUNFCCC iyo hay'adda hirgalinta qaranka (NIE) ee Sanduuqa La qabsiga iyo GCF waa inay sii wadaan fududaynta ansixinta soo jeedinta mashruuca ee qoraalada fikradda iyo horumarinta soo jeedinta mashruuca iyo bixinta iyadoo ay kormeerayso hey'adda NDA.

g) Wasaaradda Qorshaynta iyo dhaqaalaha oo u qaabilsan dhanka maalgashiga, waxay doorkeeda ka qaadan doontaa fududaynta maalgashiga cimilada Soomaaliya ee maalgashadayaasha gudaha iyo dibaddaba, waxayna si gaar ah isugu xidhi doontaa, ulana socon doontaa fulinta mashaariicda Soomaaliya.

**Daneeyayaasha kale**

Bulshada rayidka ah, bahda waxbarashada iyo hey'adaha gaarka loo leeyahay ayaa ah daneeyayaasha muhiimka ah ee fulinaya oo kormeeraya siyaasaddan maaliyadda cimilada.

a) Hay'adaha cilmi-baarista iyo jaamacadaha ayaa kaalin muhiim ah ka qaadan doona cilmi-baarista, waxbarashada, kobcinta awoodda iyo sameynta xarumo heer sare ah oo ku saabsan tiknoolajiyada nadiifka ah, maalgelinta cimilada iyo yareenta qiiqa.

b) Bulshada Rayidka ahi waxay door muhiim ah ka qaadan doontaa wacyi-gelinta, la socodka iyo kormeerka waxaana lagu dhiirigelinayaa inay helaan dhaqaalaha cimilada si loo fuliyo hindisayaasha u adkaysta kaarboonka iyo cimilada hooseeya.

c) Qaybta gaarka loo leeyahay waxay noqon doontaa mid muhiim u ah fulinta tilaabooyin iyo maalgelinta tignoolajiyada u adkeysiga cimilada-kaarboon-yar.
d) In la sameeyo iskaashi dawladeed iyo mid gaar loo leeyahay oo ah goob lagu diyaariyo kheyraadka lana xoojiyo ka-qaybgalka daneeyayaasha hindisayaasha u adkeysiga jawiga kaarboon ee hooseeya, bixinta dhiirigelinta iyo dejinta maalgashiga cimilada oo wanaagsan.

# CUTUBKA LIXAAD

# LASOCODKA, TABINTA WARBIXINTA IYO QIIMAYNTA

## 5.0. Dabagalka  iyo Qiimaynta

Wasaaradda Deegaanka, iyadoo la kaashanaysa Wasaaradda Qorshaynta, ayaa mas'uul ka ah la socodka iyo qiimaynta (M&E) waxayna horumarinaysaa barnaamij joogto ah oo loogu talagalay lasocodka iyo qiimeynta (M&E) ee siyaasadda maaliyadda cimilada. Barnaamijka waa in ay fuliyaan daneeyayaasha ay khusayso oo ka kala socda qaybaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay waxaana la guda geli doonaa si loo hubiyo in siyaasadda aragtideeda fog, hadafkeeda, ujeedooyinkeeda iyo istiraatijiyaddeeda si habboon loo fuliyo. Siyaasaddan maaliyadda cimilada waa in dib loo eegis lagu sameeyaa saddexdii sanoba mar si loo qiimeeyo waxtarkeeda iyo sida ay ugu habboon tahay la tacaalidda arrimaha maaliyadda cimilada ee heer qaran iyo heer caalami.

**Bayaanka siyaasadda:**

Dawladdu waxay dhisi doontaa qaab-dhismeedka Kormeerka, Warbixinta iyo Xaqiijinta (MRV) heer qaran si ay u bixiso aragti cad oo ku saabsan qulqulka dhaqaalaha cimilada gudaha iyo kan caalamiga ah, isbeddellada, ilaha iyo ujeedooyinka.

**Waxqabadyada:**

a) hormari hanaan iyo samenta xeerar dejinaya hababka iyo awoodaha lagu kormeerayo dhaqaalaha, wareejinta tignoolajiyada, iyo taageerada awood-dhisidda ee la helay si loogu hoggaansamo Qaab-dhismeedka Hufnaanta ee Paris.

b) In la sameeyo hanaan lagu kormeerayo laguna daba-galayo adeegsiga maaliyadda cimilada ee kala duwan ee heer qaran, dowlad-goboleedyo xubinta ka ah federaalka, kuwa aan dawliga ahayn iyo kuwa gaarka loo leeyahay si kor loogu qaado daacadnimada loogana takhaluso dhaqamada musuqmaasuqa.

c) Iyada oo la kaashanayo habka maaliyadda cimilada (Sanduuqa Isbeddelka Cimilada), in la dhiso nidaamka daba-galka maaliyadda cimilada, oo ay ku jiraan horumarinta sharci-hoosaadyada loo baahan yahay, iyadoo la tixgelinayo hababka ugu wanaagsan ee caalamiga ah iyo shuruudaha Qaab-dhismeedka Hufnaanta ee Paris.

d) Mudnaan siinta iyo kor u qaadida isticmaalka hababka jira ee Kormeerka, Warbixinta iyo Xaqiijinta (MRV), xog ururinta iyo hababka maaraynta macluumaadka, sida horumarinta ama hagaajinta Nidaamka Kormeerka iyo Qiimaynta Isku-dhafka ah ee Qaranka (NIMES), Nidaamyada Macluumaadka Maareynta Maaliyadeed ee Isku-dhafan (IFMIS) iyo Nidaamka Macluumaadka Maareynta Mashruuca Elektarooniga ah (E- ProMIS) ee dhamaystirka, daahfurnaanta, isbarbardhigga, saxnaanta iyo hufnaanta ee ku saabsan maaliyadda cimilada iyada oo la shaqaynaysa wasaaradda qorshaynta.

e) Xaqijinta in nidaamka maaliyadda cimilada ee (MRV) uu si daah-furnaan ah ula jaan-qaadayo qaranka iyo dawladaha xubnaha ka ah federaalka qorshe horumarineed oo waara, miisaaniyad-dejin iyo nidaamyo lasocodka.

f) Daabacaada iyo faafinta macluumaadka la cusboonaysiiyay ee maaliyadda cimilada, iyo bixinta agabka lagama maarmaanka ah ee waajibaadka warbixinta caalamiga ah ee maaliyadda cimilada.

g) Taageerada dhisidda awoodda NDA, NIEs iyo jilayaasha kale ee maaliyadda cimilada si ay ula socdaan isbeddelka cimilada iyo saamaynta horumarinta waarta ee mashaariicda la fulinayo iyo warbixin ku saabsan barnaamijyada isbeddelka cimilada siyaasad-dejiyeyaasha iyo hay'adaha deeqaha.

h) Dhisidda awoodaha hay'adaha qaranka iyo federaalka xubnaha ka ah si ay uga qayb qaataan geeddi-socodka iyo nidaamyada (MRV), oo ay ku jiraan la socodka qulqulka dhaqaalaha, gudbinta tignoolajiyada iyo taageerada awood-dhisidda ee la helay; iyo la socodka saamaynta horumarka qaranka iyo kuwa waara ee ka dhasha hawlaha.

i) Horumarinta awooda hay'adaha si ay ufuliyaan xisaabinta asaasiga ah ee hay'adaha waaweyn ee soo saara GHG si loo fududeeyo la socodka iyo warbixinta qiiqa GHG, awood MRV ee maaliyadda ku salaysan natiijooyinka.

j) In la sameeyo isgaarsiin wax ku ool ah oo ku habboon labadii sano ee la soo dhaafay dadaallada dalka si loo abaabulo dhaqaale ku filan, oo ay ku jiraan bixinta lacagaha dadweynaha ee howlaha cimilada.

k) Samaynta hanaanka lagula soconayo qoondaynta miisaaniyada iyo bixinta kharashaadka kuwaas oo lagu abuuri karo miisaaniyad ka jawaabida sinanta bulshada iyo waliba gudaha wasaaradaha iyo hay’adaha cimilada .

## LIFAAQA: QEEXITAANNO IYO ERAY-BIXIN

- **Cimilada:** Cabbir isku jir ah oo ah celceliska hananka kala duwanaanshaha heerkulka, qoyaanka, cirka sodhaca, dabaysha, tirinta qaybaha jawiga iyo doorsoomayaasha saadaasha hawada ee gobolka muddo dheer (badanaa 30 sano).

- **Isbeddelka Cimilada:** Marka loo eego heshiiska qaab-dhismeedka Qaramada Midoobay ee Isbeddelka Cimilada ee UNFCCC, macneheedu waa "isbeddel cimilo oo si toos ah ama si dadban loog aaneeyo howlaha bani'aadamka kaas oo beddelaya ka koobnashaha  jawiga caalamiga ah kaas oo ay u dheer tahay isbeddelka cimilada dabiiciga ah ee lagu arkay marka la barbardhigo. waqtiyada.

- **La qabsiga:** waxa ay ku qeexday UNFCCC oo ah heshiiska qaab-dhismeedka Qaramada Midoobay ee Isbeddelka Cimilada "isbedel lagu sameeyay hababka dabiiciga ah ama bini'aadamka iyada oo laga jawaabayo kicinta cimilada dhabta ah ama la filayo ama saameyntooda, taas oo dhexdhexaadisa waxyeelada ama ka faa'iidaysiga fursadaha faa'iidada leh".

- **Yareyn ama Hoos u Dhigid (Mitigation):**Waa ficillada aadanaha ee ku aadan siddii loo yareeyn lahaa kaarboonka hawada wasakheeya.Tusaale: isticmaalka shidaal nadiif ah amaaalado aan shidaal badan isticmaalin, tamarta cadceedda/qoraxda ama dabeysha, dhir-beeris iyo balaarintakeymaha. (UNFCCC).

- **Erayga "maaliyadda cimilada":** waxa loo qeexi karaa siyaaba kaladuwan mana jiro qeexid la isku raacay. Qiimaynta Laba Sannadlaha ah ee 2016 iyo Dulmarka Maaliyadeed Cimilada (UNFCCC), waxa loola jeedaa maaliyadda cimilada sida ilaha dhaqaale ee loo qoondeyay la qabsiga iyo yaraynta isbeddelka cimilada adduunka oo dhan, ujeeddaduna tahay yaraynta qiiqa ama hawoyinka jawiga e dhulka GHG, yaraynta unuglaanshaha, iyo joogteenta  iyo kordhinta adkeysiga aadanaha iyo nidamyada deegaanka.  Ku keenayo  isbeddelka cimilada xun.

- **Hay’adda Qaran ee cimilada (NDA):** Maamulka ay umagacawdo dowladda dhexe ee Sanduuqa Cimilada Cagaaran, in ay ku taliyaan soo jeedinta maalgelinta guddiga iyada oo la raacayo lana tixgalinayo istaraatiijiyada cimilada iyo qorshayaasha qaranka..\

- **Hay'ada hirgalinta Qaranka isbedelka Cimilada (NIE):** Waa Hay'ad qaran oo sharci ahoo ay aqoonsi ka heshay GCF gudigeeda oo buxisa shuruudaha/qodobbada helitaanka maalgelinta hirgelinta waxqabadyada la aqbali karo ee GCF ay ansixisay.

- **Hay'ad la aqoonsan yahay:** Hay'ado/ nidamyo qaran, gobol ama qeybo badankuwaas oo buuxiya heerarka sanduuqa oo gaaray marka loo ego heerka aqoonsiga. Waxay noqon kartaa mid gaar ah, mid guud ama mid aan dawli ahayn. Hay'adaha waxay noqon karaan kuwo loo aqoonsado inay fulinayaan, gaarsiinayaan ama fulinayaan.

- **Hay'adda Fulintu (EE):** Waa hay'ad mas'uul ka ah fulinta mashaariicda/barnaamijyada ay maalgeliso GCF. Waxa dalka ka jiri kara wax ka badan hal hay’ad fulinaysa mashruuca. Hay’adahan fulinaya waxa dooranaya hay’adaha fulinaya, iyaga ayaana kula xisaabtamaya. Mararka qaarkood, labada hay'ad fulinaysa iyo Hay'ada hirgalinta Qaranka **(**NIE) waxay noqon karaan nidaam isku mid ah.

- **Hay'ad:** Wa hay'ad raadinaysa aqoonsiga ee Sanduuqa cimilada cagaaran (GCF) si ay uga hesho ilaha dhaqaale Sanduuqa mashaariicdeeda iyo barnaamijyadeeda. Hay'aduhu waxay noqon karaan hay'ad qaran, gobol ama caalami ah oo ka kala socda qaybaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Hay'adaha qaarkood waxay ciyaaraan doorka fulinta mashruuca/barnaamijka heer qaran ee ay heshay hay'adda la aqoonsan yahay.

- **Awood uyeelasho toos ah oo hormarsan (EDA):** Waa hab ay waddamada soo koraya ay ku helaan dhaqaale iyaga oo u maraya hay'ado qaran oo laga aqoonsan yahay GCF si ay u hirgeliyaan barnaamijyo leh go'aan gaar ah oo xulashada iyo ansixinta mashaariicda heer waddan. Dalka iyo hay'aduhu waxay leeyihiin lahaansho dheeraad ah iyo awood go'aan-qaadasho si ay u fuliyaan barnaamijyada ay ku heshiiyeen GCF.

- **Iskaashiga Dawladda iyo Haydaha Gaarka ah:** Xariir qandaraas oo u dhexeeya qaybta dawladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay si loo maalgeliyo, loo qaabeeyo, loo dhiso loona iyo hawlgelinta tas-hiilaadka sida waddooyinka, isbitaallada iyo dugsiyada. Ujeedada xiriirkani waa in la isticmaalo siyaasadaha iyo qawaaniinta dadweynaha si looga faa'ideysto maalgelinta ganacsiga gaarka loo leeyahay, kuwaas oo lacag ka heli doona hay'adda dadweynaha bixinta adeeg qeexan.

- **Habka Horumarinta Casriyeynta (CDM):** Nidaam hoos yimaada hab-maamuuska Kyoto kaas oo wadamada horumaray ay ku maalgelin karaan mashaariicda yaraynta ama ka saarida qiiqa gaaska aqalka dhirta lagu sii daayo ee wadamada soo koraya iyo, beddelkeeda, ay helaan sumcad si ay sidaas u sameeyaan, taas oo ay codsan karaan buuxinta xadka qasabka ah. on iyaga u gaar ah  sideynta qiiqa.

- **Helitaanka Maalgelin toos ah:** Habka ay hay'adaha qaranka ee la aqoonsan yahay (hanashada awood e tooska ah) ee dalalka soo koraya ay si toos ah u helaan maalgelin ay bixiso sanduuqa caalamiga ah si loo fuliyo mashaariicda iyo/ama barnaamijyada la doortay. Hay'adahan ayaa laga yaabaa inay rabaan inay doortaan hay'ado kale oo fulinaya si ay u fuliyaan shaqada.

- **Hay'adda fulinta  (IE):** Waa hay'ad mas'uul ka ah qiimeenta iyo taageeridda mashruucyada iyo soo jeedinta barnaamijka iyo bixinta maalgelinta sanduuqa marka soo jeedinta lagu guuleysto.

- **Hananka yarenta sideynta qiiqa:** Habka suuqa ku salaysan ee lagu xakameynayo qiiqa gaaska aqalka dhirta lagu koriyo. Waxay sahlaysa gadashada iyo iibinta gaaska aqalka dhirta lagu koriyo iyada oo siinaya shahaadooyin la aqoonsan yahay.

- **Qaab-dhismeedka Dabagalka iyo la-xisaabtanka:** Baaritaan xilliyeed ah waxqabadka hay'adaha la aqoonsan yahay oo ay soo hormariso GCF. Qaabdhismeedku waxa uu leeyahay laba qaybood: i) La socodka hay'adda la aqoonsan yahay oo u hoggaansan heerarka aqoonsiga iyo ii) Kormeerka iyo qiimaynta mashaariicda iyo barnaamijyada ay maalgeliso GCF. Kormeerka u hoggaansanaanta (1), hay'adaha la aqoonsan waxay u baahan yihiin inay

sameeyaan is-qiimeyn sannadle ah, dib-u-eegis muddada-dhexe ah iyo sidoo kale dib-u-eegis u hoggaansanaanta  haddii loo baahdo.

- **Qorshaha la qabsiga qaranka (NAP):** Wa Hannaan lagu dhisay qaab-dhismeedka laqabsiga ee  Cancun (CAF). Waxay awood u siinaysaa Axsaabta inay dejiyaan oo ay hirgeliyaan qorshayaasha la-qabsiga qaranka (NAPs) si ay u ogaadaan baahiyaha la qabsiga muddada-dhexe iyo fog iyo horumarinta iyo hirgelinta xeeladaha iyo barnaamijyada wax looga qabanayo baahiyahaas. Waa geedi socod joogto ah, horusocod ah oo soo noqnoqonaya kaas oo raacaya hab waddanku hoggaamiyo, dareen-lab iyo dhedig, ka qaybqaadasho iyo hab hufan oo dhammaystiran."

- **Kago nashaha kaqebqadashada qaran (NDC):** Wa Matalaat dadalo dhowr ah uu wadan kastaa sameeyay si loo dhimo qiiqa qaranka iyo la qabsiga saameynta isbedelka cimilada. Heshiiska Paris (Qodobka 4, faqradiisa 2) ee Heshiiska Qaab-dhismeedka Qaramada Midoobay ee Isbeddelka Cimilada (UNFCCC) wuxuu u baahan yahay dhinac kasta inuu diyaariyo, la xiriiro oo uu ilaaliyo tabarucaadka qaran ee go'aamiyay ee isdaba jooga (NDCs) ee uu doonayo inuu ku guuleysto. Dhinacyadu waa inay raacaan tillaabooyinka dhimista gudaha iyadoo ujeedadu tahay in la gaaro ujeedooyinka tabarucaadka  xigasho: UNFCCC.

- **Kaalmada Horumarinta Rasmiga ah (ODA):** Waxa loola jeedaa kaalmada maaliyadeed ee la siiyo wadamada soo koraya iyo hay'adaha kala duwan ee hay'adaha rasmiga ah, oo ay ku jiraan dawladaha gobolka iyo dawladaha hoose ee wadamada horumaray, si kor loogu qaado horumarkooda dhaqaale iyo daryeelkooda. ODA waxa kale oo loo yaqaan gargaarka shisheeye.

- **Hananka Maalgelinta**: ‘’Xisbiyada dalka horumaray waa in ay bixiyaan ilo dhaqaale si ay uga caawiyaan xisbiyada dalka soo koraya fulinta heshiiska UNFCCC’’. Si taas loo fududeeyo, Axdigu waxa uu sameeyay hannaan maaliyadeed si dhaqaale loogu bixiyo Xisbiyada dalka soo koraya. Hawlgalka Farsamaynta Maaliyadda waxaa loo xilsaaray Xarunta Deegaanka ee Caalamiga ah (GEF) iyo Sanduuqa Cimilada Cagaaran (GCF).

- **Tabcashada Casriga ah (Climate Smart Agriculture):**Waa habka hagasiddii loo qaadi lahaa tallaabooyinka loo baahan yahay inisbeddel lagu sameeyo nidaamka wax soo saarka beeraha iyadoo la tixgelinayo isbeddelka cimilada is la markaana si wax ku ool ah loo horumarinayo sugnaanta cuntada. Ujeedooyinka **Tabcashada Casriga ah** waa saddex: in si joogteysan/waara (sustainable) kor loogu qaado wax soo saarka beeraha iyo dakhliga ka soo baxa, kor u qaadida la-qabsashada iyo u adkeysiga isbeddelka cimilada, iyo yareynta ama hoos u dhigidakaarboonka hawada wasakheeya intii suurtagal ah (IPCC).

- **U diyaargarowga Masiibooyinka:**Waa tallaabooyinka la qaado si loogu diyaargaroobo ama loo yareeyo waxyeelooyinka masiibooyinka. Waa saadaalinta iyo haddii ay suurtagal tahay, ka hortagga masiibooyinka, yareynta saameynta soo gaadhi kartanoolaha iyo deegaanka, in si wax ku ool ah looga jawaabo waxna looga qabto saameynta/raad-reebkooda masiibooyinka. (Ururka Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas - IFRC).

- **NidaamkaDigniinta Hore** (**Early Warning System**):Waa awooddaha loo baahan yahay in la sameeyo/kobciyosi loo ururiyo loona faafiyo (baahiyo) macluumaadka digniinta oo wax ku ool ah iyadoo la baahinayo wakhtiga ku haboon ama loo baahan yahay. Taasi waxa ay dadweynaha, bulshada iyo cid kasta u suurtogelinaysaa in ay helaan wakhtiama fursad ay ugu diyaar garoobaansi loo yareeyo waxyeelada ama khasaaraha masiibooyinka ka dhalan kara (IPCC).

- **Kaarboonka Hawada Wasakheeya (GHGs):**Waa gaasaska wasakheeya hawada kuwaas oosababa kululaansha adduunka iyo isbeddelka cimilada. Gaasaskaas kuwa ugu muhiimsan waxaa ka mid ahKaarboon laba oxide ($CO_2$), methane ($CH_4$) iyo nitrous oxide ($N_20$). Gaasaska kale ayaa ah hydrofluorocarbons (HFCs), perfluorocarbons (PFCs) iyo sulphur hexafluoride ($SF_6$). (UNFCCC).

- **U adkaysiga:**Sida laga soo xigtay IPCC, waa "awoodda nidaamka bulsho ama deegaan si uu u adkeysiga dhibatoyinka iyadoo la ilaalinayo isla qaab-dhismeedka aasaasiga ah iyo siyaabaha loo shaqeeyo, awoodda is-abaabulka iyo awoodda la qabsiga dhibatoyinka iyo isbeddelka." Waa awooda lagu noolaado, laga soo kabsado oo xataa lagu horumariyo xaaladaha cimilada

ee is-beddelka ah. Waxaa ka mid ah awoodda lagu fahmo saameynta suurtagalka ah iyo in la qaado tallaabada ku habboon ka hor, inta lagu jiro iyo ka dib dhacdo gaar ah, sida daad weyn ama abaar dabadheer, si loo yareeyo saameynta xun iyo ilaalinta awoodda wax ka qabashada xaaladaha isbeddelaya, oo ay ku jiraan xaaladaha aan la saadaalin karin.

- **Xeerka Miisaaniyadda Isbeddelka Cimilada:** Xeer loo isticmaalo in lagu sumadeeyo madaxda miisaaniyada qaranka ee ku saabsan isbeddelka cimilada, tusaale ahaan, la qabsiga iyo yaraynta, iyada oo loo qaybinayo tallaabooyinka cimilada saddex qaybood - aad u habboon, habboon oo dhexdhexaad ah. Waxay ka caawisaa si ay ula socdaan mugga iyo dabeecadda maaliyadda cimilada iyo fududaynaysaa mudnaanta maalgashiga horumarinta khuseeya cimilada ee qaybaha ugu nugul (Dowladda Nepal).

- **Nuglaanta/Ujilicsananta:** Marka loo eego IPCC waa "heerka uu nidaamku u nugul yahay oo aanu awoodin inuu la qabsado, saamaynta xun ee isbeddelka cimilada oo ay ku jiraan kala duwanaanshaha cimilada iyo deeganada adag.

- **Awoodsiinta Deegaanka:** siyaasadda qaranka oo adag iyo Qab-shaqeedka Macaahidd, si wax ku ool ah loo qorsheeyo, hilidda, bixinta, maaraynta cimilada iyo si hufan oo isla xisaabtan ah.

- **Ilaalinta Deegaanka iyo Bulshada:** Barnaamij kasta ama mashruuc kasta waa inuu xaddidaa khataraha deegaanka iyo bulshada ugu yaraan. Ilaalinta Deegaanka iyo Bulshada (ESS) waa tillaabooyinka la qaaday si looga hortago loona yareeyo waxyeelada aan loo baahnayn ee suurtagalka ah ee dadka iyo deegaanka

- **Kabidda/ tageerada deegaanka** iyo wareejinta la midka ah waa wareejinta loogu talagalay in lagu taageero hawlaha ilaalinta deegaanka ama lagu yareynayo isticmaalka iyo soo saarista kheyraadka dabiiciga ah. (Xigasho: SEEA)